Hadaba wax qabadyadaas dhamaantood marka loo eego qeexi taana sayniska ma, aadan qaban wax hawl ah. Marka, loo eego qeexitaan Fisigiska hawsha waxaa laqabtay marka tamartu ay iska badasho qaab ee ay isu badasho qaab kale.

Hawsha waxaa laqabtaa marka xoog loo adeeg sado walaxda, oo ay walaxdu dhaqaaqdo foganta (s) dhinac Jihada xooga.



Jaantuska. 4.1 xoog \vec{F} wuxun qabtey hawl.

Sida Jaantuska 4.1 xoog (F) waxuu dhaqaa Jiyey walaxda cufkeedu yahay (m) isagoo kadhaqaa Jinaya Barta (P) ilaa "Q" oo sameenaya ya barabaxa (\vec{s}). Sidaas darteed

Hawshu = xooga x barabaxa

$$W = \vec{F} \times \vec{s}$$

Marka W = hawsha

$$F = \text{xooga}$$

$$S = \text{bara} - \text{baxa}$$


Hawshu waxay lamid tahay taranta xoogaiyo bara baxu ay sa meeyeen in kastoo xooga iyo bara- baxu ay yihin xadi – leebyo, laakiin Hawshu waa xadi foolwaa.

Marka shay culus dhulka kor uga qaadid ee aad dul dhigtid Khaanad waa Tu saale fi can oo ah hawsha.

Hadaba haddii xooga loo falo Jihada aaney walaxdu usoconin marka qaybaha xooga iyo johooyinkooda, ayuun baa hawsha qabanaya haddii xoog loo adegsaday walaxdu aanu sameynin fogaan oo uu ahaato midnegi, markaa wax hawl ah laguma qaban xooga.

Hadaba xoogu waa inuu yeesho qaybo kala duwan ama jihoooyin kala duwan oo uu u socdo.

Qof socod, da Fogaan, isaga oo wada walax leh culeys, maqaban wax howl (ah Isaga oo walax sida (Jasntaska 4.2).



Jaantuska 4.2 Nin wada walax oo socday fogaan (s) oo cufka walaxduyahay (m).

Hawlgalka 4.2

Wada falankee ya adiga iyosaaxiibadaa Hawsha uu qabtey nin wada culeys oo socday fogaan.

Halbeega caalamiga ah ee hawshuna waa Newton x meter (NM) kaas oo loo ya qaano Joule (J).

Hal Juul oo hawl ah ayaa la qab tey marka uu xooga Newton (N) dhaqaajiyo walax, barabax dhan 1 mitir (m).

Markaa: –

1 Juul (J) = 1 Newton (N) x 1 mitir (m).

Halbeega hawshu “Joule” waxaa loogu magac daray saynisyahankii caanka ahaan ee ahaa Inqiriska ee la adhan Jirey:-

“Dames Prescott Joule, Sanadkii (1818-1989) saynisyahan ka oo soosarey waxyaabo fara badan oo kusaab san tamarta kulka marka aynu cabireyno xadi weyn ama xadi yar oohawl ah waxay na isticmaa leynaa horgaleyaasha Juulka, sida. Kilo Juul ka (KJ) mega Juule (MJ), milli Joule (mJ) iyo wixii lamid ah.

Tusaale ahaan

1 Kilo Joule = 1000 J
1 Mega Joule = 1000,000J
1 mili Joule = 0.001 J

Tusaale 4.1

1. Sanduuq ayaa lagu riihey xoog dhan 180N isaga, oon karaarin fogaan dhan 5m si jiifto ah sibidh ka dushisa. Hadaba waa imisa hawsha laqabtey?

Siin	Waydiin	Fur-furis
$F = 180\text{N}$ $\vec{s} = 5\text{m}$	$W = ?$	$W = \vec{F} \times \vec{s}$ $W = 180\text{N} \times 5\text{m}$ $= 900\text{N.m}$ $= 900 \text{ J}$

2. Cuf ayaa labara – bixiyey fogaan dhan 20m, iyadoo loo adeegsadey xoogdhan 100N.
- b) Waa imisa hawsha laqabtey?
- t) in tee bay noqo neysaa hawshu ? haddii xoogu laban laabmo, bar – baxuna, aanu is bedelin.
- J) intee bay no qoneysaa hawsha, haddii fogaanta lakala badho, oo aanu xoogu isbadalin.

Siin	Waydiin	Fur-furis
b) $\vec{F} = 100 \text{ N}$	$W = ?$	$W = \vec{F} \times \vec{S} = 100\text{N} \times 20\text{m}$ $= 2000 \text{ N.m}$ $= 2000 \text{ J} = 2\text{KJ}$
t) $F = 200\text{N}$	$W = ?$	<p>Fur-furis</p> $W = \vec{F} \times \vec{S} = 200\text{N} \times 20\text{m}$ $= 4000\text{J}$ $= 4\text{KJ}.$

∴ Marka Xooga lalaban laabo sidookale hawshana way laban lab may saa.
j) Kalabadhka 20m = 10m, S= 10m

$$W = \vec{F} \times \vec{S} = 100 \text{ N} \times 10\text{m} = 1000 \text{ NM.}$$

$$= 1000\text{J} = 1\text{kJ}$$

3. Waa in tee xooga kor loogu gaadi karo culeys dhan 50kg, Joog dhan 2m. Haddii hawsha laqabtey ay tahay 1000 J.

Siin	Waydiin	fur-furis
$W = 1000\text{J}$	$F = ?$	$W = F \times S$ $F = \frac{W}{S} = \frac{w}{s} = \frac{1000\text{J}}{2\text{m}} = 500 \text{ N}$

Xaqijinta 4.1

- Sheeg xaaladaha hawsha lagu qabto?
- Qor is le, egta loo isticmaalo xisaabinta hawsha, summado ahaan?
- Xisaabi Hawsha uu qabtey maslax marka uu culeys kor ugu qaato xoog dhan 20N. Joogdhan 1.5m.
- Maxaa kudhacaya hawsha marka xoogu laban laabmo, ee aaney fogaantu isbedelin?

4.2 Tamarta

Hawlalka 4.3

Wada falaaqeeya adiga iyo saaxiibadaa kuwan soosocda:-

- Dhagax kor uqaad, miyaad adeegsa tey tamar.
- Hada dhagax tuur, ooku Jabi dhagax yar oo kale ama loox.
- Waa maxay tamartu?
- Sharax, xidhiidhka kadhixeyya hawsha iyo tamarta.
 - Maxay walaxdu ku qabataa tamar teeda?
 - Sidee baan ucbiri karnaa tamarta walaxda?

Qeybihii hore waxaan kusoo baraney hawsha iney tahay wax ay qabatey walaxi cutubkana waxaan kubaranaynaa tamartu iney tahay waxa ay walaxi iska, leedahay. Hadaba waxaan lee nahay walax du waxay lee dahay tamar, marka ay karey so iney hawl qabato.

Sidaas darted tamarta waxaan ku cabbir karnaa xaddiga howsha ee ay walaxdu qabatey.

Tamartu waa kartida hawl lagu qabto Tamartu waa xadi foolwaa sida hawsha Halbeega caalamiga ah ee tamartu wuxuu lamid yahay halbeeg caalamiga ah ee hawsha waana Joule (J).

Hawlgalka 4.4

Wada Falan qeeya adiga iyo saaxii badaa su, aalahaan soosocda.

- i. Sharax Noocyada kala du wan ee tamarta.
- ii. Sheeg nooca tamarta ee aad u malayneysid in wadankeena aad looga isticmaalo
- iii. Wada falan qeeya tamarta sida isugudubto.

Caalaman kan aan ku noolahay waxaan ku aragnaa noocyoo kala duwan oo tamar'ah sida.

- Tamarta danabka
- Tamarta kiimikaad.
- Tamarta (Niyuukleerka)
- Tamarta cad-ceeda
- Tamarta Jabaqde
- Tamarta Kulka
- Tamarta Guud
- Tamarta dabaysha
- Tamarta biyaha I. W. M.

Qaybtana waxaan muhimada saareynaa Tamarta guud, Tamarta guud waa tamar ay walaxdu leedahay marka loo eego socodkeeda ama nagaanshaheeda marka ay dultaalo oogada dhulka.

Hadaba waxaa Jira laba nooc oo tamarta guud ah kuwaas oo kala ah

- i) Tamar socod (K.E).
- ii) Tamar negi (P.E).

i) Tamarta socod (K.E). Tamarta socodku waa tamarta ay wa laxdu lee dahay marka ay socod sameyso.

Tusaale ahaan :- Baabuur soconaya, dhagax la tuurey, Taayir wareegaya I. W. M Waxay lee yihiin tamar socod marka loo eega socod kooda.

Tamarta socod ee walax leedahay cuf, ah (m) waxay kusoco taa xa waare (V) Marka xisaab ahaan waxaa loo qexi karaa sidan:-

$$K. E. = \frac{1}{2} mv^2 \text{ (Cufka) (xawaare)}^2$$

$$K.E. = \frac{1}{2} mv^2$$

Tamarta socod ku waa xadi fool waa waxay leedahay laxaad kaliya.

Tmsaale 4.2

Xabbad leh cuf dhan 20g ayaa lagu direy xawaare dhan 250m/s. Waa imisa tamartiisa socod?

Siin	Waydiin	Fur-furis
$m = 20\text{g}$ $= 0.02\text{kg}$	$K.E = ?$	$K.E = \frac{1}{2} mv^2$ $= \frac{1}{2} \times 0.02 \text{ kg.} (250 \text{ m/s})^2$ $= \frac{1}{2} \times 0.02 \times 62500 (\text{kg. m}^2/\text{s}^2)$ $K.E = 625 \text{ J}$
$v = 250\text{m/s}$		
su, aalo, furan		

Wada falan qeeya adiga iyo saaxi badaa tamarta socod ee buulet ee aan tasaalaha kore kusoo sheegney marka:-

b) Keynaan ku yahay madoorsoome, laakiin cufka aan laban laabno.

t) cufku uu yahay madoorsome, laaki in keynaanku uu laban laabmo.

Tamarta negi (P.E): Waa tamarta neg soo ururta walaxda marka ay walaxdu taalo oogada dhulka, tusaale ahaan ka qaadis tnag caro ha dhulka dushisa waxay lee yihiin tamar negi.

Tibixda (negi) waa keydsan.

Tamarta negi ee walaxda cufkeeduyahay (m) kor loogu qaado Joog ah (h) dhulka dushiisa waxaa xisaab ahaan loo qeexi karaa.

P.E. = culeyska x Jooga (Marka:- $W= mg$).

P.E. = mgh marka:-

P.E. = Tamarta negi

M = cufka walaxda

g= cuf – isjiidadka

h= Jooga walaxda

Kani waa qeexi taanka tamarta negi ee ay walaxi leedahay marke loo eego meesha ay taalo meel. Wuxaad kubaran doontaan fasalad sare Noocyo Kala oo tamar negi.

Tusaale 4.3

Dhagax cuf kiisu yahay 80kg ayaa kor loogu qaaday dhismo dherer kiisu dhan yahay 30m.

- Waa imisa tamar negi ee dhaxan Kordhiyey marka ($g = 10 \text{ m/s}^2$).

Siin	Waydiin	Fur-furis
$m = 80\text{kg}$	$P.E=?$	$P.E = mgh$
$h = 30\text{m}$		$= 80\text{g} \times 10\text{m/s} \times 30\text{m}$
$g = (10 \text{ m/s}^2)$		$= 24000\text{J}$
		$= 24 \text{ KJ}$

Tasaale 4.4

1. Waa in xawaaraha baabuur cuf kiisuyahay 800kg oo leh tamar socod oo dhan 640KJ?

Haddii uuc ufkoo kala badh mo, tamarta socodna aaney isbadalin?

Siin	Waydiin	fur-furis
$m = 800 \text{ kg}$	$v = ?$	$K.E. = \frac{1}{2} mv^2$
$K.E. = 640,000\text{J}$		$\Rightarrow 640,000\text{J} = (\frac{1}{2} \times 800 \text{ kg}) v^2$
$= 640 \text{ kJ}$		$\Rightarrow v^2 = \frac{640,000\text{J}}{400 \text{ kg}}$
		$v^2 = 1600 \text{ m}^2/\text{s}^2$
		$v = \sqrt{1600} = 40\text{m/s}$

- Haddii cufka baabuurku kala badhmo Sida $m = 400\text{kg}$, markaa $K.E. = \frac{1}{2} mv^2$

$$640,000 = \frac{1}{2} \times 400 \text{ kg} \times v^2$$

$$v^2 = \frac{640,000\text{J}}{200\text{kg}} = 3,200 \text{ m}^2/\text{s}^2$$

$$v = \frac{200\text{kg}}{\sqrt{3,200}} = 56.57 \text{ m/s}$$

$$v = \sqrt{3,200} \approx 56.57 \text{ m/s}$$

2. Wiishka loo isticmaalo in waxlagu qaado marka, dhisma, dhaadheer la dhisayo ayaalagu qaadey walax cufkeedu dhan yahay 320kg. si loo gaadh siiyo dhismo Joogiisu uu dhan yahay 40m markaa waa imisa tamar uuku qaadayo wiishku?



Jaantaska 4.3 wiish.

Siin	Waydiin
$m = 320 \text{ kg}$	$P.E. = ?$
$h = 40 \text{ m}$	
$g = 10\text{m/s}^2$	

fur-furis

Marka walaxdu waxay leedahay tamar negi.

$$\begin{aligned} P.E. &= mgh \\ &= (320 \text{ kg}) (10\text{m/s}^2) (40 \text{ m}) \\ &= 128,000 \text{ J} \end{aligned}$$

3. Joog in tee dhan ayaa walax leh cufdhan 100kg kor loogu qaadi Karaa, haddii ay leedahay tamar dhan. 1 mJ?

Siin	Waydiin	Fur-furis
$m = 100 \text{ kg}$	$h = ?$	xidhiidhka PE = mgh, waxaan heleynaa
$g = 10\text{m/s}^2$		
$P.E. = 1 \text{ MJ} =$		$h = \frac{PE}{mg} = \frac{1,000,000\text{J}}{(100\text{kg})(10\text{m/s}^2)}$
$1,000,000 \text{ J}$		Sidaas darteed $h = 1000 \text{ m}$

Xaqijinta 4.2

- I. Sheeg xidhiidka ka dhexeeye hawsha laqabtay iyo tamarta?
- II. Sheeg labada Nooc ee ay tamarta guud ka kooban tahay.
- III. Sheeg xadiyada ay tamar ta socod kuxidhan tamartu? U Qeex isle, eg ahaan (adigoo istic maalaya summadaha).
- IV. Sheeg xadiyada ay tamarta negi kuxidhan tahay? Uqeex isle, eg ahaan (adigoo istic maalaya summadaha).
- V. Kubad leh cuf dhan 0.25kg ayaa lagu Laagey xawaare dhan 20m/s, waa imisa tamarta socod?
- VI. b) Sicad uqeex Farqiga udhexeeyaa K.E iyo P.E.
 - t) Tusaale kasheeg nooc kasta oo tamarta kamida.
 - j) miyey tamartu isaga gudub taa KE ilaa P.E. ama isweydaar ataa? Sharaxaad kabixi Jawab taada oo tusaale ku caddee?

4.3 Isugudbinta Tamarta Iyo Keydinta Tamarta

Hawe galba 4.6

Wada faleeqeeya adiga iyo saaxiibadaa

kala duwanaanshaha xaalaadaha soosocda:-


b) Xarunta danab dhalinta (Biyo xidheenka kokoda, Biyo xidheenka gill – gill I. W. M.)

Waxaan isticmaalaa tamarta danab dhalinta ee caasimadeheena.

t) Waxaanu isticmaaleynaa tamarta shidaalka in aan wax ku karsano.

J) waxaan u isticmaalaa baytariga tamarta kiimikad si, aan uga shidano tooshka, ama aan ugu dhagaysano raadiyawga.

Maxa kudhacaya noocyada kala duwan ee tamarta? Tamarta miyaa la abuurikaraa ama labur burin kaa? Sharaxaad kabixi



Jaantuska 4.4 bedelida tamarta guud.

Hadaba nolol maal meedkeena waxaan isticmaalaa noocyada kala duwan ee tamarta. Tamarta isubedesha ama igudubta, Baahida dadku ayuqabaan, sida. Makiinadaha, koombuterka iyo qalabkale ee lagu qabto hawsha. Tusaale ahaan haddii aan usoo qaadano. Tamarta kiimikaad ee dnuxusha Baadrool

ka, ama gaaska waxay isu bedellaan kul iyo ileys tamar, marka aynu shidaneyno. Laakiin cashirkan waxaan ku eegay naa isugudbida tamarta negi iyo tamarta socod iswaydaa. Tusaale ahaan, Fiiri kubada cufka (m) kasoodhac day dusha sare ee dhismaha oo Joogeedu yahay (h). Sida kamuuqada (Jaantusko 4.4).

Marka ay kubadu ku sugantahay dusha sare ee dhismaha waxay leedahay tamar negi oo kaliya.

Taasoo ah P.E= mgh.

Markay kubada bilawdo iney soodhacdo waxay yeelaneysa tamar negi iyo tamar socod. Tamar-negi ee ay lahayd walaxdu markey dusha sare taaley hadda waxey isu bedelay saa tamar socod.

Taasoo ah P.E. + Ke = mgh + $\frac{1}{2} mv^2$


Ugudanbeyntii kubadu marka ayku soo dhacdo dhulka kubadu waxay leedahay tamar-socod .

Taasoo macnaheedu yahay tamartii negi (keyd). Ee kubada waxay isu bedeshey tamar socod. Wadar ahaan.

Taasoo ah KE = $\frac{1}{2} mv^2$

Hadaba, Tamrta negi ee dusha dhismuhu waxay lamidtahay tamarta socod ee dhulka dushiisa marka ay kubadu soo gaadhay.

$Mgh = \frac{1}{2} mv^2$



Jaantaska, 4.5 Isugudibka tamarta guud ee walhadaha fudud.

Hawl – galka 4.7

Ugu shaqeeya hawlalkan soosocda koox ahaan idinkoo isticmaalaya qalabkan soosocda, kubada walhadaha, xadhig iyo ganto laga soo laad laadiye miis dheer.

- I. Kuxidh kubada walhadaha barta uu kudh amaado xadhigu adiga oo kor, u sudhaya gantada sida scdakamuuqata (Jaantuska 4.5a).
- II. Barabixi kubada walhadaha barta “A” sida kamuuqata Jaantuska 4.5 (b) oo soo cehir
- III. Sharax xeerka isu gudubka tamarta iyo keydsan ka tamarta.

Hawlalka 4.7 waxaad xusuusan tiihiin walhadaha K.E. iyo P.E ay isku bad badalayaan sijoogto ah.

Tamarta kubada walhadaha na dhamaan tamarta negi iney tahay barta “A”, sidoo kale tamarta socodkuna waa barta ay iskage midka yihii (Barta B).

Mee laha kale sida barta diyo E. way leeyihin P.E. iyo K.E. (fiirijaan tuska 4.5b). Badanaba walhaduhu waa is taagey.


Marka uu istaago Dhamaan tamarta waxay isu badali kulkaasoo ay sababeyso caabiga hawada ee kahor imanaya. Ama isliska hawada.

xeerka keyd sinka tamarta waa midkamida xeerarka guud ee dabiiciga ah waxaynu u qeexaynaa sidan:-

“Tamarta lama abuuri, karo, lamana bur- burin karo” Kaliya waxay iskabadashaa nooc waxayna ubadalan taa nooc kale.

Tamarta biyo soo dhacaya

Tamarta guud ee ay walaxdu leedahay waa tamar negi iyo tamrta socod ama labada Hadaba Hadii aan fiirino isugudubka iyo keydsanka tamarta guud ee biyo soo dhacaya. Biyaha soo dhacayaa waa isha kaliya ee tamarta danab dhalinta ee wadankeena aynaan wali si iskuxig aynaan u isticmaalin.



Jaantuska 4.6 Biyaha kasoo dhacaya taangigu waxay lee yihiin tamar negi iyo tamar socod barta ay kasoo dhacayaan.

Shaxanka kuyaala Jaantuska 4.6 wuxuu ina tusayaa inbiyaha taangiga ku Jiraa inay leeyihiin tamarnege oo marka loo ee go barta uu yaalo. (M.E. = PE) laakin kadib marka ay biyuhu bilaabaan iney soo dhacaan iyaga oo soo dhex maray. Tuubada (ama qasabada). Waxay yee lanayaa tamar socod, oo uu sababey socodku Tamartan socod waxaa loo is ticmaala in lagu Joojiyo makiinada awood dhalinta kadibna mashin ku inuu wareego.

Ugu da beyntii, marka ay biyuhu soo gaadhaan Makiinada dab dhalinta biyuhu waxay leeyihiin tamar socod (M.E= K.E).

Marka ay biyuhu daaxmarayaan tuun bada tamar toodu waxay isugu jirtaa wadarta labada tamarood ee kala ah tamarta negi iyo tamarta socod.

Sidaas tarteed.

$$\text{M.E.} = \text{P.E} + \text{K. E}$$

Xusuusnow:- Tamarta Kiimikaad ee biyaha biyo xidheen, kaliya waxay leeyitiin tamarnege xagooda sare, sidoo kale xaga hoosana waxay ku leeyihi kaliya tamar socod. Tamarta soo dhicitaanka biyuhu waxay inatusay saa in tamarta guud aaney isbadelin oo ay ahaaneyso Joog to.

Tamarta dabaysha

Hawl galka 4.8

- Waamaxay dabayshu?
- Maxaa tamarta lagu qabtaa?
- Sheeg tuseele muhiim ah oo tilmaamay waxy aabaha ay dabayshu qabato.

Sidoo kale Faseexada dabaysha oo laba iyo inkabadan oo kor loogu xidhay meel sare waxay dhaqaajin karaan danabka mishiin ka lagu xidhay Tanina waxay dhacdaa marka dabayshu ay leedahay tamar socod oo wareejineysa faseexa-daha, sidaas darted dabaysha wareejineysa. Mishiinku waxay soo saartaa qul qul danab. Tamarta danab ee aysoo saar tay dabayshu waxaa loo adeeg sadaa in biyaha lagaga soo qaado ceelasha dhaadheer iyo ileyska guryaha.



Jaantuska 4.7 Tamar dhaliyaha dabe yshu Wuxuu tamarta socod ubadal tamardanab.

xaqiiJin 4.3

1. Maxaad ka Fahan tay tibxahan (b) iskubedelka tamarta (t) keyd sanka tamarta.
2. Sheeg xeerarka keysan ka tamarta
3. Shara xaad kabixi tamar ay lee yihiin biyo meelsare kasoo dhacaya oo ku soo dhacaya dhulka.
4. Tamar nooceee, ah ayey dabeysu leedahay? Tusaale kabixi waxa, ay bini aadanku uistic maalaan tamarta dabeysa?
5. Fiiri walax soo dhacay sa ama walhade wal hanaya oo waxaad qeexdaa tamarta isbedeleysa markasta?

4.4 Awooda

Hawlalka 4.9

1. Wada falanqe eya adiga iyo saaxii badaa ama xubnaha qoyskiina, macnaha ereyga (Awood).
read kula kulantaa nolol maal meedka
2. Tusaale kabixi
 - A wood duleed
 - A wood siyaasadeed
 - A wood shaqsi ahaaneed
 - A wood
3. Waa maxay farqiga adhexeeyaa a wooda aan la kulano nololmaal meedkeena iyo Awooda ay isticmaalan saynis yahanadu.
4. Casha haday bara baxiso shay fogaan dhan 10m,oo ay ku bara bixi so amin dhan 2min sidookale Deqa aybarabixiso shay fogaan lamid ah fogaanta Casha bay ku barabixisay amin dhan 5 daqiiqo, hadaba koodeebaa a wood badan? casha ama Deqa? Sharax kabixi?

Badanaa waxaa hawsha laqabtaa marka culeysku sameeyo Joog laakin ismaweydino imisa daqiiqo ama saaca dood bay shaqada lagu qabtey.

Sikastaba ha ahaate waxaa laga mamaar maan ah, la firiyo wakhtiga ay hawsha qaadaneyso

A wooda waa xadi saleed kaas oo looqexi karo saamiga a minta igo hawsha A woodu waa saamiga A minta iyo hawsha laqabtey

$$A \text{ wood} = \frac{\text{Hawsna}}{\text{A min int e}} = p = \frac{W}{t}$$

Marka P= A wooda

W= hawsha

T= A minta

Hadaba hawsha, tamarta, iyo a wood a waa xadi foolwa halbeega caalamiga'ah ee a woodu waa joule/ seken Kan oo looyaqaanaa watt. A wood 1w waxa soo saarey marka laiskuqeybiyo 1 Joule iyo 1sakan

Marka xadi weyn oo a wood sameysmo waxaan isticmaaleyna (kw) iyo mega watt markaa

$$1\text{KW} = 100\text{W}$$

$$1\text{MW} = 1000,000\text{W}.$$

Tusaale 4.5

1. Makiinadayaa qaaday cufdhan 50 kg, waxaana kor uqaadatay Joogdhan 60m, mudo 4seken ah xisaabi a wooda ayku qaaday makiinadu? ($g= 10 \text{ m/s}^2$)

Siiin	Waydiin	Fur-furis
$m = 50\text{kg}$	$P = ?$	$P = w/t \text{ markaa}$
$h = 60\text{m}$		$\therefore P = \frac{W}{t} \text{ PE} = mgh$
$t = 4 \text{ seken}$		$\therefore P = \frac{mgh}{t}$
$g = 10\text{m/s}^2$		$P = \frac{(50\text{kg})(60\text{m}) \left(\frac{10\text{m}}{\text{s}^2} \right)}{4\text{seken}}$
Sidaas darted $P = 7500 \text{ W}$		
	$P = 7.5 \text{ kw}$	

2) xisaabi A wooda qasabad Kor u tuuraysa biyo dhan 300 litir, haddi Jooga qasabodu yahay 12m, oo ay amintu dhan tahay 8 seken

Xusuusnow:- 1 kilo littir ee biyaha ahi wuxuu lamid yahay 1kg oo biyo'ah

Siiin	Waydiin	Fur-Furis
$m = 12\text{m}$	$P = ?$	$\therefore P = \frac{mgh}{t}$
$h = 8\text{seken}$		$\therefore P = \frac{(300\text{kg})(10\text{m/s}^2)(12\text{m})}{8\text{seken}}$
$t = 300\text{kg}$		
$g = 10\text{m/s}^2$		$P = 4500\text{w} = 4.5 \text{ kw}$

Xaqijjin 4.4

- Waa intee a wood danabka "mitad" ama "daawe" daawahan oo hawshiisu tahay 2kj amintisuna tahay 1 seken
- Baaldi biyo kabuuxaan oo cufkiisu dhan yahay 3kg, ayaa laga soo dawlisay ceel hoos udheer 10m. ayey gabadhi kaga soo saartey ceelka, baaldiga mudo dhan 2 daqiqo. Hadaba waa imisa a wooda gabadhu? Haddii ($g = 10\text{m/s}^2$).

Soo koobbidda cutubka

Cutubka waxaad kusoo bara teen

- Hawsha waxaa laqabtaa marka tamari isebedesho
- Hawsha waxaa laqabtaa marka xoogu sameeyo fogaan, ah dhinaca Jihada xooga $W = FS$
- Halbeega caalamiga ah ee hawshaiyo tamartu waa Joule (Joule) (J).
- Hawsha, Tamarta, iyo Awooda, waa xadiyo foolwaa.
- Tamarta guud waa wadar ta, tamar ta socod iyo tamarta negi ee walaxda.
- Tamarta socod ee walaxdu waa tamarta usuurto galisa socodka.
- Wawaana loo qeexaa sidan
-
- $K E. = \frac{1}{2} mv^2$
- Tamrta negi waa tamarta ay walaxdu lee dahay marka ay taalo bar. Wawaan loo qeexaa sidan
- $P.E. = mgh$
- A wood waxaa loo qeexaa inay tahay saamiga A minta iyo hawsha waxaana

$$\text{lagu qeexayaa sidan } P = \frac{W}{t}$$

Halbeega caalamiga ah ee awoodu waa watt (w) kaas oo ah Joule / seken (J/S).

Nakhtinka su'aalaha iyo masalooyinka

I. Ku buuxi meelaha banaan erey ama weedha kuhaboon

1. Hawsha waxaa looqee xaa inaytahay taranta _____ iyo _____.
2. Halbeega caalamiga ah ee Hawshu waa _____.
3. _____ Waa kartida hawsha lagu qabto
4. Halbeega hawsha, Tamarta iyo A woodu waa _____.
5. Ji hada Xoog la adeegsadey waa in ay noqotaa _____ fogaan ta. Siloo yidhaahdo hawlbaa laqabtey.
6. _____ Wuxuu in oo sheegaa in tamartu ayna abuurmin ayna burburin laak iin ay isubadasho nooc kale.
7. _____ waa saamiga amminta iyo hawshe.
8. Halbeeg caalamige ee awooduwaa _____.
9. Tamarta guud waa wadarta _____ iyo _____.

II. Fur – fur masaloo yinka soo so cada

1. Xoog dhan 20 N ayaa sanduuq lagu riixay sanduuq leh cufdhan 18 kg, sanduuqaa oo sameeyey bara – bax dhan 6m. waa imisa how sha uu qabtey?
2. Walax leh cuf dhan 20 kg, ayaa kor loogu gaaday dhismo joogiisu yahay 25m waa imisa tamarta negi eeku keydsan walax daas? (haddi $g = 10\text{m/s}^2$)
3. Wiish ayaakor uqaaday walax leh cuf dhan 450 kg, waxuuna gaadhsiiyey dhismo Joogiisu dhan yahay 50m, /L/ waxuuna ku gaadh siyey mudo dhan 5seken Haddi ($g = 10\text{m/s}^2$) hadaba waxaad xisaabisaa (b) tamarta negi ee walaxda (t) A wooda, wiishka
4. dayaxgac meed dad sameeyey ayaa cufkiisu dhan yahay 900kg waxaa lagu diray xawaare dhan 1100m/s Hadaba waa in tee tamarta socod ee dayax gac meedku?
5. waa imisa Jooga walax leh cufdhan 2kg oo kor loogu tuurey xawaare dhan 15 m/s) (haddi $g = 10\text{m/s}^2$).
6. Daynabo biyood ayaa tuuraysa biyo dhan 200 litir, waxayku tuuraysa Joogdhan 6m., mudo dhan 2 seken (haddi $g = 10\text{m/s}^2$)
 Waa imisa Tamar negi)
 Haddi 1litir = 1kg oo biyo,ah
7. Kaawiyad ayaa leh a wood dhan 1000w. Hadaba Hawl in tee dhan ayey ku qaban kartaa mudo hal saac dhan?

Ujeedooyinka Cutubka: Marka cutubkani dhammodo dabadeed ardaydu waxay awoodi doonaan in ay:

- ✓ **Fahmaan Nuxurka La xidhiidha Makiinadaha Fudud**
- ✓ **Abuuraan xirfad lagu Maareeyo Masalooyinka La xidhiidha Makiinadaha Fudud**
- ✓ **La Socdaan isu xidhnaan shaha shayada oo dhan.**
- ✓ **Isticmaalaan waxyaalo suurtagalah oo badan si ay u horumariyaan Aqoonta la xidhiidha fikradaha Muhiimka ah ee Fiisigiska**

Hordhac

Miyaad xasuusataa Noocyada kala duwan ee makiinadaha Fudud ee waxbarashadii sayniska.

Hawlgalka 5.1

U kala ururi qalabyadan soo socda kuwo Makiinado ah iyo kuwa aan ahayn. Midi, maqas, dismiss, kombuyuter, Furaha kookaha, eksel, teeb, mishiinka laydhka, dalace, khafiyad iyo daawe,

Sayniska majiraan faraq u dhixeyya makiinadaha, Alaabta iyo Qalabyada. Waxay leeyihii macno isku mid ah. cuttubkan waxaan ku Baran doonaa, waxyaalo ku saabsan makiinadaha kaasoo kaa caawin doona inay shaqada uu kuu fududeeyo iyo in aad u qabato sidii loogu talo galay. Waxaa kale oo aad ku baran doontaa ujeedooyinka qaarka Ka mid ah makiinadaha Fudud inagoo u eegana saamiga keynaankooda, Abdo makiinadeedka iyo waxtarkooda. Si loo fahmo ujeedada makiinadaha, waxaad u baahan tahay in aad Nakhtiinto macnaha xoogga, shaqada, culeyska, saamiga iyo Boqoleyda, waayo, waxaad badanaa ku isticmaali cutubkan.

5.1 Qeexida Makiinadaha

Hawlgalka 5.2

- i. Arday ahaan waxaad maalin kasta isticmaashaa wax Fiiqan, Ama Gooye. Ama sikiin si aad ugu Fiiqdo Qalin qoriga. Sharax Faa iidada aad ka heshay isticmaalida Qalabkan.
- ii. Adigoo Adeegsanaya Waayo Aragnimadaada maalin walba aad la kulanto tax qaar ka mid ah qalabyada Ama Alaabaha Kuwaasoo Ka caawiya dadka inay noloshooda ka dhigaan mid dhibyar (Fudud). Kala dood saaxiibadaa siday shaqadood ugu dhibyarayso.
- iii. Waa Maxay Makiinaduhu? Miyaan ku magacaabi karnaa Alaabaha korku Xusan makiinado? Waayo?
- iv. Qor magacda alaabada, Kuwaasoo aad u malaynayso inaanay ahayn makiinado?

Haddaanay jirin makiinad (Sakiin), gooye ama Fiiqe, maxaad u isticmaali lahayd inaad ku fiiqdo qalin – goriqaaga? Waxaa laga yaabaa in aad isticmaali lahayd ilkahaaga Ama mindi si aad u Fiiqdo qalin qorigaaga. Fikradani kuma haboona shaqadan. Sidaa si la mid ah waxaan isticmaalaa qalabyo kala duwan Hawlgaladeena maalinlaha ah si aan uga dhigno shaqadeena mid Fudud.

Mindida, maqasyada, Dismiska, Furaha dhalooyinka lagu Furo, ekselka, Kabaal Khafiyada iyo Daawaha IWM waa qaar ka mid ah makiinadaha Ama qalabyada kuwaasoo shaqooyin keena ka dhiga mid Fudud.

Makiinadu: waa qalab kasta, kaasoo inaga caawiya in aan uqabano shaqada si Fudud.

Makiinaduhu waa tamar Badalayaal. Badanaa makiinaduhu ma Abuuraan tamar Ama tamar uma Badalaan to kale. Waxay u Gudbiyaan tamarta Guud eekushaqeynaysa xoogga yar tamar Guud oo ku shaqeyneysa xoog badan.

Makiinaduhu Waxay mataalan xoog Ama xawaare badiyeyal. Waxaa loo istic maalaa shaqo fududeeye yaal.

Maxaan u isticmaalaa Makiinadaha?

Hawlgalka 5.3

Kala dood su aalahan saaxiibadaa Ama waalidkaaga.

- i) Maxay dadku u isticmaalaan sallaxa janjeedha si ay kor ugu qaadaan walxo kala duwan ooy dul – riixaan? (tilmaan: waa si loo yareeyo xoogga loo baahan yahay Ama kor loogu qaado xawaaraha?)
- ii) Maxay dadku u isticmaalaan Baaskiil, halkii ay socon (lugayn) lahaayeen ama ordi lahaayeen? (Tilmaan waa si loo kaydiyo Tamarta? Ama loo yareeyo xooga loo baahnaa? Ama loo degdego?)
- iii) Maxaan u isticmaalaa khafiyad kaliya oo taagan si aan biyaha uga soo saarno ceel – dheer?

Kartidu waa xoogga Aad ku isticmaasho makiinada.
Culeys waa xoogga lagu isticmaalo makiinada


Marka aad ka doodaysaan su' aalaha hawlgalka 5.3 waxaad u baahan tahay in aad isticmaasho Tibxaha **Kartida iyo culeyska**.

Shaqada (E) waa xoogga lagu isticmaalo makiinada ayadoo walax Ama shakhsii lagu isticmaalo sida Bani – aadamka.

Culeys (L) waa xoogga culeyska lagu isticmaalo makiinada si walaxda loo qaado Ama dhaqaajiyo Waa xoogga ay Makiinadu shaqada ku qabato ayadoo kaga hortagaysa xoogga culeyska Ama isliska.

Inagoo tan maskaxda ku hayna, ka fikir sababta dadku u isticmaalaan Baaskiilka, sallaxa janjeedha iyo khafiyada qotonta, Dadku waxay u isticmaalaan Makiinadaha ugu yaraan midka mid ah ujeedooyinkan kan:- waxayna yihiin:-

1. Si xooggu u bato
2. Si xawaarahaa loo badiyo
3. Si loo badalo jihada xooga



Aan qaadano salaxa janjeedha ee ka muuqda jaantuska 5.1 xoogga loo Adeegsaday (isticmaalay) walax dibada kaga timaada shay saran sallax janjeedha dushiisa si loo dhaqaajiyo Ama riixo waa shaqada la qabanayo. Fogaanta ay le'eg tahay in shaqo la qabtay waa Fogaanta shaqada. Shaygii (dhagax) waxuu kor u socday fogaan cayiman ayadoo la isticmaalayo sallaxa janjeedha. Culeyska Ama miisaanka walaxdu waa culeyska; kolka Fogaanta uu kacayo loo yaqaan Fogaanta culeyska. Sallaxa janjeedha shaqo Ama karti yar ayaa loo baahan yahay in lagu qaado culeys weyn.

Haddaba, sallaxa janjeedha waxaa loo isticmaalaa si loogu badiyo xoogga waa makiinad xoogga Badisa.

Makiinadaha waxaa la yidhaaa waa xoog badiyeaal markay inoo qaban karayaan inaynu ku qaadno culeys weyn inagu ku isticmaaleyna karti aad u yar culeysku uu ka weyn yahay hawsha.

Tusaale ahaan:- Haddad kor u qaadid culeys dhan 400N Xoog Ama karti dhan 40N adigo isticmaalaya Makiinad, Waxaad awoodi kartaa inaad ku isticmaashid 10 jeerlaab Awood Rasmiga ahayd. Xaaladaha Noocan ah Makiinadu waa qalab xoog badiye.

Aan qaadano Nooc Kale oo Makiinadeed oo la dhaho Baaskiil. Dadku waxay door bidaan l-inay Fuulaan Baaskiil inay lugeeyaan (Jaantuska J 5. 2)

Baaskiilka, Fogaanta yar ee uu ku socdo qofka wareejiyaha cagtu waxay Badinaysaa Taayirada Baaskiilka iyo Fogaanta dheer ee uu socon lahaa mudada la midka ah. Hadaba, Baaskiilka waxaa la dhahaa xawaare Badiye Ama Fogaan Badiye.

Makiinadaha waxaa la dhahaa fogaan badiye, marka ay dadku Awoodi karaan inay qaadaan culeys fogaan aad u dheer ayagoo u isticmaalaya shaqo ay ku qabanayaan fogaan gaaban (yar).

Hadda, Fogaanta lagu qabtay shaqadu wey ka yartahay fogaanta culeysku socday.

Tusaale: Wuxuu loo isticmaalaan in kor loogu qaado culeyska sida Biyaha laga soo sarayo ceel gun dheer ama Gaadhiga oo kor loogu qaado. Xaalada Noocan ah Makiinadaha waxaa loo isticmaalaa inay xawaaraha Badiyaan ama Fogaanta Badiyaan.



Jaantuska 5.2



Jaantuska 5.3 Khafiyad qotonta oo kaliya.

Hawigalka 5.4

Makiinadu miyey Badiyaan xoogga iyo fogaan ta waqtii isku mid ah? Ka dooda sabata adiga iyo saaxiibadaa.

Khafiyadu waa Tusaale kale oo Makiinad ah. Khafiyada kaliya ee qotonta ee ka Muuqata Janntuska 5.3 waxaa loo isticmaalaa in kor loogu qaado culeyska sida Biyaha laga soo sarayo ceel gun dheer ama Gaadhiga oo kor loogu qaado.

Culeyska kor iyo hoos loo qaadayo kan ayaa lagu isticm aalay. Awooda Ama kartida lagu isticmaalay waxay le'eg tahay culeyska, laakiin jijo ahaan way ka soo horjeeda. Hadaba, halka khafiyada ah ee taagani waa makiinad jijo Bedele.

Qiimeynta 5.1

1. Makiinadu waa maxay?
2. Sharax seddex ujeedooyin oo loo isticmaalo makiinadaha Fudud.
3. Makiinadu miyey waqtii isku mid ah kordhin kartaa xoogga iyo fogaantaba?
4. Qeex Tibxaha (weedhaha)
 - b) karti
 - t) culeys

5.2 Abdo Makiinadeeda, Saamiga Keynaanka Iyo Waxqabadka Makiinadaha

b) Abdo – makiinadeedka (Am)

Hawlgalka 5.5

- Miyaad cabbiri kartaa Abdada makiinad lagu siiyey? Sidee ayaad cabbiri kartaa?
- Tixgali (Aan qaadano) culeys dhan 120N in uu socdo kadib Marka lagu isticmaalo Awood (xoog) dhan 30N, Makiinada, waa maxay Abdada, taasoo aad ka heshay isticmaalida makiinadu?
- Waa maxay weedha (Tibixda) loo isticmaalo si loo sharaxo abdada Makiinada?**

Waxaad ku soo Aragtay hawlgalka 5.5 (ii) in dhaqaajinta culeys dhan 120N loo isticmaaley Awood (karti) dhan 30N kaliya. Halkan waxaad dhihi kartaa in makiinadu ay badisay kartida. Haddaba Abdada aad ka heshay isticmaalka isticmaalka makiinadu waa seddex – laabka xooggii hore. Abdada ama Faa'iidda Aad ka heshay makiinadda waxaa la dhahaa Abdo – makiinadeed (AM).

Xaddiga fiisigis ee loo isticmaalo sharixida Abdada Makiinada waxaa loo yaqaana abdada mekaanikaad (AM) waxayna inoo sheegataa inta jeer ee makiinadu Badisay waxqabadka (kartida).

Makiinadkasta abdada makiinadu waa saamiga culeyska iyo kartida

$$\text{A.M.} = \frac{\text{Culeys}}{\text{Karti}} = \text{A.M.} = \frac{C}{K}$$

$$\text{Ama (M.A)} = \frac{L}{E}$$

Maxaad ka sheegi kartaa halbeega A.M ee tibaax da xagga sare?

Tusaalahka shaqeysan ee 5.1

Culeys dhan 360N ayaa waxaa lagu dhaqaajiyey karti dhan 60 N in Makiinada lagu isticmaalo. Waa Maxay Abdada mekaanikaad ee makiinadu?

Siln	Waydin	Fur furis
------	--------	-----------

$$L = 360\text{N}$$

$$MA = ?$$

$$AM = L/E = 360\text{N}/60\text{N} = 6$$

$$E = 60\text{ N}$$

Tan macnaheedu waa makiinada waxaa loo isticmaalay si loo Badiyo 6 jeer xoogga lagu isticmaalay. Tusaalahka sare waxaa ku cad in A.M ay tahay xaddi Fisikis oo aan dhinacyo lahayn sida ma'laha halbeeg.

Waxaa jira laba Nooc oo Abdo – Makiina – deed:

- b) **Abdo- makiinadeedka caadiga ah: waa Abdo – makiinadeedka taasoo makiinadu ay soo saarto xaalada caadiga ah (marka xoogga islisku jir'o)**
- t) **abdo- makiinadeed aan caadi ahayn: waa Abdo – makiinaddeedka taasoo makiinadu ay soo saarto ayadoon xoog islis jirin.**

OGOW: A.M Makiiinadu Wuxuu ku xidhan yahay xooga isliska ee ka dhexeeya culeyska iyo Makiiinada.

t) saamiga keynaanka

Hawlgalka 5.6

Kala dood saaxiibadaa

- i) Maxaa ku dhici AM haddii makiinadu aanay lahayn wax xoog islis ah?
- ii) Makiinadu ma waxay u baahan tahay Awood badan mise tu yar?

Doodaada hawlgalka 5.6 waxaa laga Fahmay in kartida looga baahan yahay ay ka yaraan doonto ta makiinada aanay ku lahayn xoogga isliska.

Sida:- Ma jiro xoogga caabujada on loo baahan yahay in laga hortago.

Saamiga keynaanku (VR) waa ka samaysma Abdo – makiinadeedka aan Lahayn xoogga isliska ee makiinada. Saami – keynaanka waxaa loo yaqaan Abdo – makiinade – edka aan caadiga ahayn (IMA)

Saamiga – keynaan makiinad kastaa waxaa loo qeexaa saamiga fogaanta ay kartidu socoto inta culeysku socdo:

**Sida VR = Fogaanta ay dhaqaaqiso kertidu (Se)
Fogaanta culeysku dhaqaaqey (SL)**

$$VR = \frac{S_e}{S_L}$$

Saamiga keynaanka makiinadu malaha halbeeg

Saamiga keynaanka makiinad. Gaar ahi isma badalo, marka aad yarayso isliska, abdo – makiinadeedka caadiga ah wuxuu u dhawaadaa Abdo – Makinadeedka aan caadiga ahayn. Haddi xoogga islisku eber yahay VR = AM

Tusaalahi laga Shaqeey ee 5.2

Makiinad ayaa kor u qaaday culeys 2m, marka ay kartida wax lagu qabanayaa socotay 8m. waa maxay saamiga keynaanku ee makiinadu?

Siin	Waydiin	Fur furis
$S_e = 8\text{m}$	$VR = ?$	$VR = \frac{S_e}{S_L} = \frac{8\text{m}}{2\text{m}} = 4$
$S_l = 2\text{m}$		

Tani macmaheedu waa in xoogga la galinayaa uu socdo 44 jeer in ka dhakhso badan ka culeyska Ama Fogaan xoogga la galinayaa waa 4 laabka xoogga culeyska.

J) Kartida Waxqabadka (η)

Hawlgalka 5.7

- Sidee u Sharix kartaa weedhaha (Tibxaha) "shaqada la gaLinaya" iyo " shaqada ka soo baxaysa"?**
- Waa maxay tamarta lumeysoo?**
- Sharax " Waxqabadka" iyo " Tamarta lumaysa" labadaba, ee Makiinada, Sideey u xi dhiidhaan?**

Waxqabadku wuxuu leeyahay Macnoyaal la xidhiidha nolo ℓ-maalmeedka Marka Sayniska loo eego wuxuu leeyahay macno la xidhidha waxa soo baxa iyo waxa la galiyo.

- i) Shaqada la galiyaa (w_i) waa shaqada lagu qabta makiinada ayadoo xoog lagu isticmaalayo, waxuuna la mid yahay wax soo saarka Awooda la galiyey (E) iyo fogaanta ay Awooda la galiyey socotay (S_E).

$$W_i = E \times S_E$$

- ii) Shaqada Soo Baxdaa (W_o): waxa shaqada ay qabato Makiinadu ee ay ka qabato culeyska (walaxda). Wax ayna la mid tahay waxa uu soo saaro culeysku (walaxdu) (L) iyo Fogaanta uu socdo culeysku (S_L)

$$W_o = L \times S_L$$

Markaad ku isticmaasho xoog makiinad, waxaad ku qabatay shaqo (shagada la galiyey). Isla waqtigaas maxiinadu waxay ka qabatay shaqo culeyska (Shaqada soo baxda).


Xaalada caadiga ah shaqada soo baxdaa waa ka yar yahay, shaqada la galiyo. Miyaad bixin kartaa sababta ay uga yaraatay?

Tusaalahka Ka shaqeysan ee 5.3

Waxaad ka soo qaadaa, in xoog dhan 80N lagu isticmaalay in la dhaqaajiyo Fogaan dhan 5m, Sanduuq xoogga culeyskiisu yahay 300N in la dul – riixo sallax Janjeedha oo dhinaciisa sare 1m dhulka ka sareeyo, shaqada la galiyey waa $80N \times 5 M = 400 J$.

Shaqada ka soo baxday waa kor u qaadida kor loo qaaday saduuqa xooga culeyskisu dhan yahay 300N Fogaan dhan 1m Ama $300N \times 1m = 300J$ Mararka qaarkood waxaa la dhahaa shaqada wax qabatay.

Faraqa u dhexeeyea shaqada la galiyey iyo shaqada wax – qabatay waa 100J waana shaqada lagaga hortagay xoogga isliska. Wuxaan la dhahaa Tamarta luntay.



Jaautuska 5.4 Waxtarka sellaxa Janjeedha.

Weedha “ Waxtarka makiinadu” Waxay wax ka sheegtaa waxqabadka Maxiinada waxay inoo sheegtaa inta ay le’egtahay tamarta Makiinadu ay Badashay Ama Wax – soo saarka Shaqada.

Waxtarka (Kartida) makiinadu waxaa loo qeexaa saamiga shaqada soo baxday iyo shaqada la galiyey ku dhufashada logu dhufto saamiga 100 macnaheedu waa in Kartida loo qoro Boqolkii ba'

$$\text{Kartida} = \frac{\text{Shaqada soo baxda}}{\text{shaqada la galiyey}} \times 100\% \Rightarrow \eta = \frac{W_o}{W_i} \times 100\%$$

Halka η ay tahay kartida Makiinada, wi shaqada la galiyey iyo Wo shaqada soo baxday.

OGOW: Haddii Aanu jirin islis, kartida Makiinadu waa 100%, Sida:- $\eta = 1$, dabadeed MA=VR, Makiinada kartideedu tahay 100% waxaa la dhahaa Makiinada aan caadiga ahayn.

Su'aalo Fur'an:

Miyaa makiinad waxtarkeedu yahay 100% ama ka badan yahay laga soo saari karaa Aduunkan? Sharax Jawaabtaada.

Tusaalah 5.4

1. Waa maxay kartida makiinada taasoo hawsha lagu isticmaalay dhanayd 4200J hawsha ay soo saartayna dhan tahay 3200J?

Siin	Waydiin	Furfuris
Shaqada la galiyey= 4200J	$\eta = ?$	$\eta = \frac{\text{Shaqada ay Soo saartay}}{\text{shaqada la galiyey}} \times 100\%$
Shaqada ay soo saartay = 3200J		$\eta = \frac{3200J}{4200J} \times 100\%$ $\eta = 76.2\%$

2. Makiinad ayaa lagu isticmaalay in lagu qaado lagu isticmaalo Makiinada, culeysku wuxuu kor μ Kacay 1m, taagtuna waxay dhaqaaqday 6m. xisaabi
 b) shaqada lagu qabtay culeyska dushii'sa
 t) shaqada lagu qabtay Makiinada
 j) kartida makiinada
 x) Tamarta luntay.

Siin	Waydiin	Fur furis
$L = 250N$	b) $W_o = ?$	b) $W_o = L \times S_L = 250N \times 1m = 250J$
$E = 50N$	t) $W_i = ?$	t) $W_i = E \times S_E = 50N \times 6m = 300J$
$S_L = 1m$	j) η	j) $\eta = \frac{W_o \times 100\%}{W_i} = \frac{250J \times 100\%}{300J} = 83.3\%$
$S_E = 6m$	x) Tamarta luntay =?	x) $W.E = W_i - W_o = 300J - 250J = 50J$

Xaqijinta 5.2

1. Qeex (b) Abdo makiinadeed (AM) (t) Saamiga Keynaanka (VR) (j) Karti
 2. Waa maxay (b) Haawsha uu soo saaray? (t) Hawsha la galiyey?
 3. Waa Maxay raadka uu ku leeyahay islisiku kartida makiinada?

5.3 Nooyada Makii Nadaha Fudud

Noocyada Makiinadaha Fudud	Tusaaleyaal Ficil lagu Muujinayo
1. Kabaal	
2. Khafiyad xadhig Taag Khafiya Culeys	
3. Sallax janjeedha	
4. Taayir iyo Wareej iyaha (Baydhalka).	
5. Bool	
6. Daab	

Jaantuska 5.5 lixda nooc ee Makiinadaha

Su'aalu Furan:

Sharax waxa ay yihiin tusaaleyaasha jaantuska 5.5 sharax, halkee ayaana lagu isticmaalaa. Ka Bixi tusaale kale oo aad ka keento Deegaankaaga Nooc kasta oo ah Makiinadaha Fudud.

Hawlgalka 5.8

- i. Indho- indhee Jaantuska 5.5, sheegna lixda nooc ee makiinadaha Fudud
- ii. Qor ugu yaraan laba tusaale oo kale oo ku saabsan midkasta oo ka mid ah makiinadaha fudud ee laga isticmaalo Deegaankiina.

Guud ahaan waxaa jira laba kooxood oo makiinado ahi

- i) **Makiinad Fudud:** waa qalab kaasoo Bedela jihada Ama laxaadka xooga. Makiinada Fudud waxaa loo isticmaalaa xoog kali ah (Taag) si loogu qabto shaqo hal culeys ah. Ayadoo la iska islaawayo isliska, Shaqada lagu qabto culeysku waxay la mid tahay shaqada lagu qabtay xoogga la isticmaalay.

Makiinadaha Fududi malaha ilo Tamareed, Sidaa awgeed ma qaban karaan shaqo ka badan, ta ay ka heleen xoogga la galiyey. Marka aanu jirin islis, shaqada soo baxda (Ta lagu qabtay culeyska) wuxuula mid tahay shaqada la galiyey (xoogga la galiyey).

Makiinadaha Fududi waa lix nooc. Waxayna kala yihiin:-

- | | |
|----------------------|-------------------------------|
| 1. Kabaalka | 4. Taayirka iyo wareejiyaha |
| 2. Habka khafiyada | 5. Daabka |
| 3. Sallaxa janjeedha | 6. Boolasha iyo Ilka Geerasha |

- ii) Makiinadaha culus:- Waa Makiinadaha ka samaysan marka laysku geeyo laba Ama in ka badan oo makiinadaha Fudud ah oo isu – geeyey. Tusaale ahaan Makiinada cawska jarta (cawsjare), Teebka waxlagu qoro iyo Baabuurtu waa Tusaaleyaal Makiinadaha culus.



Jaantuska 5.6: Makiinadaha culus


Heerkan waxaad Muhimada saari doontaa makiinadaha Fududee la yaqaano oo kaliya sida:- kabaalka, khafiyada iyo sallax janjeedha.

1. Kabaalka

Hawlalka 5.9

Fiiri jaantuska 5.7 iyo 5.8, kana jawaab su'aalahan soo socda

- Waa maxay kabaalku? Magacow qeybaha kala duwan ee kabaalka.
- Bixi waxoogaa tusaaleyaal ah oo ku saabsan kabaalka, kaas oo aad u isticmaashaan waxyaalaha aad qabataan maalinkasta.
- Kabaaladu miyey yihiiin xoog badiyeyaal Ama xawaare Badiyeyaal



Jaantuska 5.7 seddex aevbood ee ugu Muhiimsan aevbaha kabaalka.



Jaantuska 5.8 Tusaaleyaal kabaal

Markaan isticmaalano malqaacad si aan sonkor ugu dhexdhigno koob shah ah, malqaacada waxaan loo isticmaalaa kabaal ahaan. Sidaa si la mid ah. Marka aan sidoo kale isticmaallayno wiishka si aan ugu qaadno culeys weyn waxaan u isticmaalaa kabaal ahaan miyaad Aragtay dad doon har dhex wada?

Ula looxaanta ah ee ay'u isticmaalayaan in ay ku kaxeeyaan Doontu waa kabaal oo kale. Maqasyada iyo sakiitu waa tusaaleyaal kale oo kabaalo ah. Waxaa jira kabaalo kala duwan kuwaaso aan u isticmaalo NOLOL Maalmeedkeena.

Kabaalku waa ul adag taasoo si dhibyar uga leexleexan karta Barta ay ka leexato taasoo Loo yaqaano Barkin (F). Kabaalku sidoo kale wuxuu ka kooban yahay Barta Taagta (E) iyo Barta culeyska (L) iyo Waliba Barkinka.

Jaantuska 5.7 wuxuu ina tusaa seddexda barood ee Muhiimka ah ee kabaalka. Waxay kala yihiiin Taagta, culeyska iyo Barkinka. Fogaanta uu dhaxeeya culeyska iyo Barkinka waxaa la dhahaa Gacmaha – culeyska, Fogaanta u dhaxaysa Taagta iyo Barkinka waxaa la dhahaa Gacanta – taagta

"I sii meel aan istaago, dabadeedna waan ka
dhaqqaqi dhulka, Barkinka dartii"




Jaantuska 5.9 Arkimedhis

Waxaa jira seddex kale oo kabaalo. Waxaa Loo qeybiyaa seddex, ku xidhan Halka la dhigayo Barkinka Ayadoo loo eegayo xidhiidhka culeyska iyo taagta ka dhexeeya (Fiiri jaantuska 5.10).

- i) Habaynta koowaad:- Barkinka waxaa la dhigi Taagta iyo culeyska dhexdooda. Tusaale
- ii) Habka labaad: culeyska waxaa la dhigi Barkinka iyo taagta dhex dooda Tusaale ahaan: kaaryoone iyo natakaraakar.
- iii) Habka seddex aad: Taagta waxaa lagu isticmaali culeyska ujo Barkin dhexdooda.

Tusaale ahaan :- AF – Musbaarka iyo

Bir – qabatada



Jaantuska 5.10 Seddexda Nooc ee Kabaalka

Abdo-Makiinadeedka Kabaalka

M.A – da Kabaalku waa saamiga culeyska iyo Taagta

$$\therefore M.A = \frac{E_L}{F_E}$$

Kabaalku waa makiinad xoog badiye Haddii Barkinku μ dhaw – yahay culeyska. Waa makiinad Badisa xawaaraha, haddii Barkinku uu u dhow yahay Taagta.

Tusaalah ka shaqeysan 5.5

1. Tixraac kabaalka shaxanka 5.10 (b) culeys dhan 400N ayaa kor loo qaaday ayadoo loo istic maalay xoog dhan 160N kabaalka Dushiisa, Haddii culeysku uu 20sm u jiro Barkinka, Taagtuna 80sm u jиро Barkinka Raadi (xisaabi)
 - b) VR ka makiinada
 - t) MA – da makiinada


Siln	Waydlin	Furfuris
$L = 400N$	b) VR = ?	$b) VR = \frac{S_E}{S_L} = \frac{80sm}{20sm} = 4$
$E = 160N$	t) MA = ?	$t) MA = \frac{L}{E} = \frac{400N}{160N}$
$S_E = 80sm$		$= 2.5$
$S_L = 20sm$		

Tusaalahka shaqeyasan ee 5.6

2. Kabaal Fudud ayuu wuxuu ku Bilaabmaa Meel jiifta dabadeedna wuxuu μ dhaqaqaa meesha ka muuqata Jaantuska 5.11

2. Xisaabi

- b) shaqada la galiyey
t) shaqada soo baxday
j) kartida



Siln	Waydlin	Furfuris
$L = 60N$	b) shaqada la galiyey	b) shaqada la galiyey =
$S_L = 25m = 0.02$	t) shaqada ka soo baxda	$40N \times 0.03 = 1.2 J$
$E = 40N$	j) η	t) Shaqada ka soo baxday =
$S_E = 35m = 0.03m$		$60N \times 0.02 = 1.20 J$
		$\eta = \frac{\text{shaqada ka Soo baxday}}{\text{shaqada la galiyey}}$
		$\eta = \frac{1.20J}{1.20J} \times 100\%$
		$= 100\%$

3. Khafiyadaha

Khafiyadu waa Taayir wareegsan oo leh Dul sibibix ah, si madax banana ugu wareegta xudunta. Taagta waxaa lagu isticmaalaa xadhiga kaasoo mara Dusha siman ee khafiyadaha. Khafiyadu:-

- Waxay badashaa jihada xoogga
- Waxay badisaa Taagta

Aasaas ahaan waxan jira Laba Nooc oo hab Khafiyadood

- b) **Khafiyada aan dhaqaqin:-** waa khafiyad aan la dhaqaqin culeyska, Taasi Macnaheedu waa ekselka ayaan ka dhaqaqeeyn meeshiisa-
- t) **khafiyad kaliya oo dhaqaqda:** waa khafiyad Taasoo La dhaqaqda culeyska. Waxay leedaha eksel wareega

b) Khafiyada kaliya ee aan dhaqaaqin:

xoogga xadhiga waxaa la yidhaa Awood. xeerkii seddexaad ee Newton waxaan ka helnay, In culeysku uu la mid yahay xoogga Lagu Iisticmaalayo. xoogga xadhigu waxuu ku ji haysan yahay xagga Taarinka xoog laxaadkiisu.

La mid yahay laakiin ka soo horjeeda. Tan macnaheedu waa culeyska iyo Taagtlu wey isle'eg yihiin laakiin wey iska soo horjeedaan.


- Waxaa loo isticmaalan in ay Badasho jihada taagta
- Awoodu waa isku mid xadhiga dhexdiisa, marka aan la tixgalin culeyska xadhiga iyo isliska ka muuqan kara khafiyada, waxaan heleynaa:

Culeysku (L) = Taagta (E)

$$\therefore MA = \frac{L}{E} = 1, \text{ dabadeed}$$

$$VR = \frac{S_E}{S_L} = 1$$

Sida:- Khafiyada aan dhaqaaqini waxay leedahay Abdo – makiinadeed 1 ah. Tani macnaheedu waa in aanay taagtlu Badanin.



Jaantuska 5.12 Khafiyad aan dhaqaaqin

t) Khafiyada kaliya ee Dhaqaaqda

Xoogga xadhigu waxuu la Mid yahay taagta lagu isticmaalo wadarta into kor μ jiidaysa khafiyadu waxay la mid tahay culeyska. Tani macnaheedu waa in taagtlu ay tahay culeyska Badhkii Ama culeysku yahay labanlaabka taagta.

$$\text{Abdo - mak iinadeedu} = \frac{\text{Culeyska}}{\text{Taagta}} = \frac{L}{E} = 2$$

Sida:- Khafiyada dhaqaaqdaa waxay leedahay Abdo – makiinadeed 2 ah.



Jaantuska 5.13 Khafiyada dhaqaaqda

Mashruuc


Waxaad dhistaa khafiyada taagan iyo khafiyada dhaqaaqda, dabadeed Go'aami μ jeedooyinkooda.

Qalabka:- laba kartoon oo kuwa qalinmaanta ah, Khafiyad, laba xadhiga dabka oo dhuu dhuuban, laba xadhigoo 50sm ah, Mastarad iyo wax kor u haya (taageere).

Jidka la marayo:-

1. Dhex- gali xadhiga dabka kartoon kasta ama Khafiyada.
2. Kasoo lul warqadataageeraha ama miis sida ka Muuqata Jaantuska 5.3 si aad u samayso khafiyad aan dhaqdhaqaaq lahayn
3. Ku xidh culeyska xadhig kuna duub (xidh) khafiyada dusheeda.
4. Cabbir dhererka (Fogaanta) culeyska iyo laagtut ay ka sareeye meel Bar tixraac ah (Dhulka ama Miiska)
5. Ku isticmaal xoog si aad kor ugu qaado culeyska
6. Cabbir fogaanta cusub markaad xoog ku isticmaashay dabadeed, dabadeed is barbar- dhig fogaanta ay dhaqaaqi karaan culeyska iyo taagtut.
7. Ku xidh warqada kale Afka taageeraha Ama miiska kuna Duub khafiyada dusheeda sida ka Muuqata shaxan ka 5.13 (j) si aad uga dhigto khafiyad dhaqdhaqaaqda.
8. Ka soo lul culeyska khafiyada dusheeda sida ka maaqata jaantuska 5.13
9. Cabbir Jooga culeyska iyo Taagtut ay ka sareeyaan Bar tixraac ah (dhulka Ama Miiska).
10. Xoog ku isticmaal si aad kor ugu qaado culeyska
11. Cabbir jooga cusub, ee markaad ku isticmaashay xoogga dabadeed isbarbar – dhig fogaan ay dhaqaaqeen culeyska iyo taagtut.
 - Fogaantee ayaa weyn khafiyada aan dhaqdhaqaaqa lahayn? Ma S_E mise S_L
 - Waa maxay ujeedada khafiyada aan dhaqdhaqaaqa lahayni?
 - Fogaantee ayaa weyn khafiyada “ma SL mise SE ?
 - Waa maxay ujeedada khafiyada dhaqdhaqaaqdaa?

Sallaxa Janjeedha



Jaantuska 5.14 Sallaxa Janjeedha

Marka Walaxi cuslaato ee ay adkaato in gaadhi la dul – dhigo Dadku Badanaa waxay dul – dhigaan loox weyn, waxayna si Janjeedh ah u dul – saaraan looxa gaadhiga si janjeedh ah, Dabadeed culeyska ayey Dul-riixaan looxa ilaa Gaadhiga uu si Fudud μ dul – dhigmo sallaxa janjeedhaa waa Dul, tiiro ah taasoo μ ogolaaneysa culeyska in si Fududud kor uu ugu socdo ayadoo lagu isticmaalayo tag ka yar, ta culeyska lagu isticmaali lahaa haddii toos kor loogu qaadi lahaa.

Sallaxa janjeedhaa waa sallax xagashiisa jiifta ee uu sameeyaa ay ka yartahay 90^0 .

Jaantuska 5.14 culeyska walaxda waxaa kor loogu qaaday ayadoo la dul -riixayo sallax janjeedha Marka culeyska kor looga soo qaado Barta A ilaa Barta B, taaga waxaa Lagu istic maalay Fogaanta S, halka culeysku si toosa kor ugu kacay jooga h. Haddaba,

$$\text{i) Saamiga keynaanku} = \frac{\text{Fogaanta taagta}}{\text{Jooga sallaxa janjeedha}}$$

$$\text{VR} = \frac{\text{Dhererka Dusha janjeedha}}{\text{jooga sallaxa janjeedha}}$$

$$\text{VR} = \frac{S}{h}$$

Sallax aan lahayn islis,

Shaqada la soo baxday = shaqada la galiyey

$$\text{ii) Abdo - makiinadeedku} = \frac{\text{Culeyska}}{\text{Taagta}} = \frac{L}{E}$$

Abdo-makiinadeedka sallaxa janjeedha ee aan lahayn islis waa saamiga dhererka Dusha janjeedha iyo jooga ay qaadato.

Hawlgalka 5.10

- i. Fogaantee ayaa weyn SE mise SL sallaxa janjeedha
- ii. Waa maxay u jeedada loo isticmaalo Sallaxa janjeedha? Maxawaare kordhiyaa mise waa xoog kordhiye?

Tusaalahaa Ka Shaqeysan ee 5.7

Jaantuska 5.14, dhererka sallaxu waa 4m Jooguna waa 1m. Muxuu Noqon doonaa saamiga keynaanka Sallaxa janjeedhaa?

Slin	Waydiin	Fur furis
$S= 40\text{m}$	$\text{VR} = ?$	$\text{VR} = \frac{S}{h} = \frac{4\text{m}}{1\text{m}} = 4$
$h= 1\text{m}$		

Waxay inoo sheegaysaa haddi aanu Jirin islis, sal laxani jan jeedhaa Wuxuu Badin taagta 4 jeer.

Xooga Maroojinta

Hawlgalka 5.11

Wiil iyo Aabihii ayaa waxay ciyaarayaan Leexo.

- i. Miyey is-ceshadaan?
- ii. Kumaa Fadhiistay meel M dhow Barkinka si uu u Ceshado Ama ay isku mid u noqdaan?
- iii. Waa maxay waxyaalaha loogabaahan yahay si ay isku ceshadaan?


Xoogga maroojintu:- waa u janjeedhsanaanta si loo wareejiyo shay xoogga Maroojintu waa taranta xoogga iyo fogaanta ku qotonta. Sida ka Muuqada jaantuska 5.15. waa' xaddi leeb; Wuxuu leeyahay Laxaad iyo jiho.

Xoogga Maroojintu = Xoogga \times Fogaanta ku qotonta

Jihada xoogga Maroojintu waa saacad Wareeg Ama lid Saacad Wareeg midkood.

Waxaa la dhihi karaa walaxi wey dheeli – tiran tahay marka xoogga maroojiska ee saacad wareeg uu la mid yahay xoogga Maroojiska ee Lid – Saacad Wareeg. Xaalada Noocan ah socod ma jiro (saameyn wareegideed).

Xoogga Maroojinta ee lid- Saacad Wareeg
= Xoogga Maroojinta ee Saacad- Wareeg.




Jaantuska 5.15 Xooga Maroojinta

Tusaalahka ka shaqeysan ee 5.8

Kabaal dhererkiiyu yahay 5m ayaa loo isticmaalay in laysugu dheelitiro culeys dhan 120N iyo xoog dhan 80N, marka Barkinka la dhigo fogaan 2m meel u jirta culeyska, Taagtana 3m μ jirta.

- b) Waa maxay xoogga maroojinta ee saacad- wareeg?
- t) Waa maxay – xoogga maroojinta ee lid – Saacad- Wareeg?
- j) Waa maxay MA – da kabaalku?
- x) waa maxay VR- Ka kabaalku?



Jaantuska 5.16 xisaabinta xoogga maroojinta

Siln

Waydilin

$$L = 120\text{N}$$

$$E = 80\text{N}$$

$$S_L = 2\text{m}$$

$$S_E = 3\text{m}$$

Furfuris

$$\text{b) } \text{Xoogga maroojinta ee saacad- Wareeg} = E \times S_E = 80\text{N} \times 3\text{m} = 24\text{Nm}$$

$$\text{t) } \text{Xoogga maroojinta ee lid – Saacad Wareeg} = L \times S_L = 120\text{N} \times 2\text{m} = 240\text{NM}$$

$$\text{j) } \text{MA} = \frac{L}{E} = \frac{120\text{N}}{80\text{N}} = 1.5$$

$$\text{x) } \text{VR} = \frac{S_E}{S_L} = \frac{3\text{m}}{2\text{m}} = 1.5$$

Xaqiijin Ama Hubin

1. Tax, Sharaxna Noocyada Makiinadaha Fudud.
2. Waa maxay Ahmiyada Ama Muhiimada ay makiinadaha Fududi u Leeyihiiin Nolol-Maalmeedkaaga?
3. Sharax sidaa u xisaabin lahayd MA, VR iyo j) ee
 - b) kabaalka t) sallaxa Janjeedha j) Khafiyada
4. Waa Maxay xoogga maroojintu?

Soo koobbidda cutubka

Cuttubkan dhexdiisa waxaad ku soo barateen in:-

- Makiinaduhu yihiin qalab, kaasoo inaga caawiya in aan shaqooyin keena si Fudud ugu qabano, waxaanu isticmaalaa Makiinadaha si aan ugu badino Fogaanta (xawaaraha), ugu badino xooga Ama Badal no jihada xoogga
- Taagtlu :- waa xoogga lagu isticmaalay makiinada
- Culeysku: waa xoogga makiinadu Qabatay.
- Makiinada waxaa la dhihi waa xoog badiye Haddii culeysku> Taagta Xawaare badiye Haddii SE < SL
- MA – da Makiinada Waxaa Lagu qeexaa Saamiga culeyska iyo Taagta.
- VR – da Makiinada waxaa loo qeexaa saamiga SE iyo SL
- Kartida makiinada waxaa loo qeexaa saamiga shaqada la qabtay iyo shaqada la galiyey.
- Kabaal waa Gobol bir ah oo adag Kaasoo si dhib yar ugu leex – leexan kara Bar lagu taageeray oo la dhaho Barkin.
- Khafiyadu waa taayir Ama shag, Wuxuuna si Fudud u ugu wareegaa udub-dhexaadkiisa asagoo maraya xuduntiisa. Khafiyada Nooca ugu Fududi waa khafiyada taagan kaligeed. Iyo khafiyada dhaqdhaqaqda.
- Sallaxa- jan jeedhaa waa tiiro kaasoo u ogaalaata culeyska in kor loogu qaado si tartiib- tartiib ah ayadoo la isticmaalayo tag yar.
- Xoogga Maroojintu waa saameynta xoogga wareegga.

Su'aalaha Makhtiinka iyo masalooyinka

I. Ka dooro jawaabta saxda ah

1. Kuwan soo socda teeбаan ahayn ujeedooyinka makiinadaha?

b) Badinta xooga	t) Badinta xawaarahaa
j) Gudbinta Tamarta	x) Badinta Tamarta
2. Keebaan ahayn kabaal, makiinadahan Soo socda

b) Wile	t) Xagaaf	j) Majarafa	x) Dube
---------	-----------	-------------	---------
3. Saamiga xawaarahaa ee khafiyad (hal) qotontaa markasta waa:

b) 2	t) 1	j) 3	x) 4
------	------	------	------
4. Saamiga xawaarahaa khafiyada (hal) Dhaqdhaqaaqda markasta waa:

b) 2	t) 1	j) 3	x) 4
------	------	------	------

II. Ku Buuxi Meelahe Banaan weedha Ama Ereyga ku Haboon.

1. Qalabka Badala jihada xooggaaoo kaliya waxaa loo yaqaanaa _____
2. _____ Waa xoogga lagu isticmaalo makiinada _____
3. Saamiga fogaanta taagta iyo fogaanta culeyska waxaa la dhahoo _____
4. _____ waa saamiga culeyska iyo taagta _____
5. Shaqada soo baxday oo loo qsybiyey shaqada la galiyey ee Makiinadaha waa la dhahaa _____

III. Jawaab Gaaban ka Bixi Su'aalahsan:

1. Miyay jirtaa makiinad caadi ah oo wax (Ama Kartideed) qabadkeedu yahay 100% waayo?
2. Miyaad sharxi kartaa seddexda wax ee ugu muhiimsan sababta aan u isticmaalo makiinadaha?

IV. Masalooyin Laga Shageynayo:

1. U Kooxee makiinadaha kabaalka ee Fudud, Khafiyada iyo sallaxa janjeedha xoog badiyeyaal, xawaare Badiyeyaal iyo Jihada taagta Badalayaal.

Xoog Badiye	Xawaare Badiye	Jihadataagta Badele

2. Haddii culeys dhan 24N uu dhaqaaqo marka lagu isticmaalo tag dhan 6N Makiinada, waa maxay MA da makiinadu?
 3. Baabuur culeyskiisu yahay 500N ayaa kor loo riixay 2m meel Banaan oo siman oo dhulka ka saraysa 5m, ka dib marku lagu istic maaley tag dhan 150N oo Barbaro la ah Meesha Banaan.
- Raadi (xisaabi):

- b) VR – Ka makiinada
- t) MA – da Makiinada
- j) Shaqada la galiyey
- x) Shaqada soo baxday
- xh) Kartida

Ujeedada Cutubka: marka uu dhamaado cutubkani waxaad awoodi doontaa

- ✓ InaadFahantid fikradaha la xidhiidha heerkulka iyo kulka.
- ✓ Horumarisid xirfada maskax ahaaneed ee masalooyinka xidhiidha heerkulka ,waa inaad xaliso xidhiidhka walxaha oo dhan.
- ✓ U adeegso si balladhan suurtagalmimada lagu hormari aqoonta fikirka quud ee fiisigiska.

Hordhaca

Horey waxaad usoo dhigatay cabbirsaleedya as – aasiga, cufka, dhererka, iyo aminta cutubkan waxaadku baran doontaa xaddiga afraad ee cabbir saleedka as – aasigaka ah waana **Heer kulka**.

Hordhaca cutubkan fikirada heerkulka iyo falanqaynta faraqa udhaxeyya heerkulka iyo kulka sidookale waxaa kujira qalabka heerkulka lagu cabbiro iskubadal ka heerkulka cabbirkiisa, ilaha iyo saamaynta heerkulka

6.1. Qeexida Heerkulka

Hawlgalka 6.1: Su'aalahaan kadoda

- i. Waamaxay heerkulku?
- ii. Daddku siiday u arkaan heer kulka kusaleynta nolol maal meed kooda?
- iii. Ma fara baa udhexeyya heerkulka iyo kulka? Sharaxkabixi?

Dad ku intabaden waxay isticmaalaan Erayga kulayl, siiqabaw iyo Qabowga oo cadeynaya heerkulka walaxda madoorsoome faraqa u dhexeyya kuleylka iyo dirimaadka qabaw iyo qabaw yar? Erayadaas si saxah ugama hadlaan walxaha heerkulka. Dadka intabaden uma kalacada waxay u isticmaalaan kulta iyo heerkulka. Laakin heerkulka iyo kulku waa xaddisaleedyo kala duwan.

Hawlgalka 6.2: *kaladooda su'aalahsan sosocda*


- i. Kafikir sadex koob oo shah ahoo kala kul ah qabaw siiqabaw iyo biyo qabow.
Darajada i. gali fartaada bidix biyaha kulul, iyo farta midigna gali biyaha qabow.
- Darajada ii. Kasaar farahaaga kulaylka iyo qabowga
- Darajada iii. Qabawga sidhaqso ah u gali labada faroodba. Dareentay, labada farood kaduwan kuwiihore? Ma kala duwanyihii?
- iv. Waa maxay faraqa udhexeeyaa kulka iyo heerkulka?

Ma kala baxday faraha tan kulul(biyaha) gali qabowga madaremay saa qabow yar. Markaad ka saar to gacantada biyaha qabow galikuwo aad uqabaw. Ma dareentay qabow. Ma sheegi kartaa kee baa qabow ama kee baa kulul?

Hawlgalkan waxaad ku baran tijaabada qabowga iyo kulaylka dareen koodu inuu nasinayn. Sababtu waa biyaha oo sii qabow qabowga farta iyo kulka in kakale. Ma soo gabagabeyn kartid qabowgaa yar iyo kulaylka ama qabowga.


Heerkulku waa cabbir saleedka as aasiga sida saddexdii hore. cufka, dhererka iyo Aminta.

Walxahu waxay kasamaysan yihiin saxaroyaryar waxan layidhaa atamyo ama molokiyuulo. Walxahan yar yari waxay ku sumaday san yihiin Goobooyin yar – yaroo. Sida fataatirta oo kale (nakhtin ku same casharadka kimistariga) walxaha adkayaashu waxay leeyihiin qaabsugan lakiin waxay ku gariiraan dhidibo horey bar ugan. Saxarada dareeraha iyo gaasku marwalba socod bay ku jiraan. Saxaradani waxay leeyihiin tamaro socod waxaana layidhaa tamar socod (Jaantuska 6.1)




Adke

Waa qaab same mugg ogan



Dareere

Qaab koonteenar mug go'gan



Gaas

Qaab koonteenar mug, aan' go'nayn

Jaantuska 6.1 Sadexda waji ee walxaha

marka walaxdu ay tahay kulay. Xawaaraha saxaradu way kordhaan sidoo kale tamar socodkooduna. Saynis ahaan kulku waa waji ka mid ah tamarta. Kulku waa tamar socodka guud ee saxarada walxaha. Heerkulkuna waa celceliska tamar socodka saxarada walxaha.

Sidaasookale heerkulka waxaa lagu qeexoo heerka kulayka igo qabawga ee walaxdu leedahy ama celceliska tamarsocod ee saxarada walaxda.

**Saxarada walxah yari
waxay leeyihin
tamarsocod heerkulkoo
du hoosego**

Heerkulkku waa cabbirka celceliska tamar socodka saxarada walxaha. Kuma saleysna baaxade walaxda. Tusaale heerkulka yare ee koobka biyaha baylka ah waa heerkulka wayn ee biyaha baylka ah ee falaasada laakiin kulkoodu waa kala duwan yahay.

Taasi waa mid aan kusaleysneyн xaddiga, habaysan, ama nooca saxarada. Tusaale cufnaanta walaxda ismabadelo cuf keedu halka uu mugu iska badalayo cufnaantu waa xaddi hawleed dag dag ah, cuf ka iyo muuguna way balaadhan yihiin siay hawsha u qabtaan iyogoo ku salaysan qalabka. Sido kale kulku waa balaadhan yahay waxana u ku salaysan yahay cadadka ama baxada saxarada walaxha tusaale ahaan 100 liter of biyo beyllah ayaa leh kulkala kala duwan laakin heerkul iskumid ah 1 liter oo biyo bayl ah. Haddi lagu shubo baraf 100 liter oo biyo ah wuu dhalaali barafku marka 1liter ee biyaha baylka ha.

Hubin 6.1

1. **Qeex erayga “Heerkul”**
2. **Cadee faraqa udhexeega heerkulka iyo kulka**
3. **Sidee baad iskugu salayn kartaa heerkulka walaxda iyo tamarsocodkeeda saxarada.**
4. **Heerkulkku waa hawsha dag – daga ee balaadhan halka kulku kayahay xaddiga balaadhan? sharax tan?**

6.2. Cabbirka Heerkulka

Hawlalka 6.3

- i. **Qeex hab dhaqameedka lagu cabbiro (Qiyaasta) heerkulka maalinwalba.**
- ii. **Waamaxay dareenkaaga kuwajahan dareemida heerkulka?**
- iii. **Maad aragtay heerkulbeega caafimadka ee ay isticmaalaan dadka caafimaadku? Waamaxay heerkulbeegu?**
- iv. **Side lagu cabbiraa heerkulbeegga?**

Nolol maal meedka, dadku ay ku isticmaalayaan gamcahooda inay hubiyaan heerkulka walahaxa kale. Tusaale cabitaanka fudud ee laga soosaarey firinjeerka lana qabtay oogada dhala waxaada dareemi “qabaw” ama “siiqabaw” sidoo kale walaxda kululi. Dadku waxay u isticmaa Laan walaxda kulul ama siiqabow. Laakiin surtagal maha cabbirka heerkulka walaxa saxda ha adoo istaabsinaya ama isticmaalaya dareenkaaga.

Si loocabbiro heerkulka walaxda waaxaan u baahanahay qalab wanaagsan oo sax ah oo lagumagacaabo heerkul beeg.


Heerkul beegu waa qalab loo isticmaalo inlagu cabbiro heerkulka walaxda waxaana lagu cabbiraa Digrii (°).

Heerkul beega ugu horeeyey waxaa lasameeyay 1592. Wuxaan sameeyey saynis yahankii Galilyo ee Talyaanig ahaa.

Heerkulbeegu waxa u ka koobanyahay dhuunyar oo dhuuban oon isbadalin salkeeda hoosena buuran yahay.

Dhuunta waxa ku jira meerkuri ama alkool dherer sugar ah. Waxay qabataa inay kalabaxdo ama isku ururto (kog to) meerkuriga ama alkoolka salka hoose ee buuran heerkul beegyadu way ka la duwanyihiin qaababkoo da iyo waxa dhuunta ugu jiraba.

Qaar kamidahi waa ku wan



b. Heer kul beega meerkuri



t. heer kul beega caafimaadka

Jaantuska 6.2 kala duwanaashah heerkul beega

- i) **Heerkul beega meerkuriga:** kani waxa uu ku shaqayn fadhiga meerkuriga uu ku fadhiyo heerkulka heerkul beega caafimaadka iyo ka shay baadhku waxa uu ka samaysanyahy meerkuriga.
Heerkul beega caafimaadka waxa lagu isticmaalaa xarumaha caafimaadka. Shaybaadhyada heerkul beega waxaa loo isticmaalaa daraasaadka sayniska
- ii) **Heerkul beega Alkoolka:** Waxa loo isticmaalaa heerkul hooseeya. Waxana uu u dhixeyaa 80°C illaa 100°C .

Hubin 6.2

1. Sideebaa si sax ah loogu cabbiraa heerkulka walaxda?
2. Sharax faraqaa udhexeyya noocyada heerkul beega?
3. Cadee siduu ushaqeeyo heerkulbeegu oo sawir heerkulbeega iyo summadiisa.

6.3. Qiyaasaha Heerkulbeega

Hawlqal 6.4

- i. Qiiyaasaha heerkul beega maxaad ka taqaan ? Sharax?
- ii. Qiyaaste lagu cabbiraa, heerkul ka dhanka saadaasha hawada iyo caafimaadka?

Maalmaha kala duwan qiyaasta heerkul beega waa laisticmaali lakiin qiyaasta laga akhrinayo, waa in aad akhrisid saddexda qiyas sugar ee magacoodu kala yahay.

1. Qiyaast sent sentigreydh gireyd (selshyas)
2. Qiyaasta feran heyt
3. Qiyaasta kalfin

Heerkul beega waxa ku cad laba barood oo go'an

Waxay kala yihiin barta hoose ee go'an (barta barfku ku dhalaalo) iyo barta sare ee go'an (barta karkarka biyaha) ee jooga bada.

I. Selshiyas (qiyaasta selsheyeska)

Qiyaasta selshiyas ama senligreydh waxaa helay iswidhish xidigoyaqaan (astromomar). (Andharsan) (Selshiyes) (1701 – 1744). Waxa uu sugay qiimaha O inuu barafku ku Fadhiisto iyo 100 inay biyuhu kubaylaan. Isagoo u qay binaya baraha go'an in iswada le, eg = 100. Qiiyaasta selshiyas ayaad heli. Qaybinta waliba waa digrii ($^{\circ}$).

Heerkulka qiyaasta selshiyas waxa lagu cadayn C° . Waxana loo akhrin digriiselshiyas (Jan 6.3).


Su'aalo Furan

Ma taqaanaa waa imisa qiyaasta heerkulka ee dadka caadiga ah inta diqrrii selshigas ee uu yahay?

II. Qiiyaasta farhnayt

Aaladan qiyaasta Farhnayt waxa helay saynisyahan Jarmal ah (Dhabiyel) Farhnayt waxa uu sugay qiimaha 32 inuu barafku ku fadhiisto iyo 212 barta baylinta biyaha .

Maadaama Faraq u dhexeeya barta barafka iyo barta karkarka biyahu waa 180. Qiiyaasta farhnayt waxaa looqaybin meelaha u dhexeeya barafka iyo barta karkarku waa 180 oo isleeg ayaa loo qaybin. Heerkulka qiiyaasta Farhnayt waxa lagu muujin F. waxana loo akhrin digriifarhnayt (eg Jan 6.3)



Jaantuska 6.3 kala baxa sentigireed iyo farhneyt

Heerkulkan qiiyaastiisa mar mar waxa loo isticmaalaa xidhiihinta warbixin gudbinta ee cimilada laakiin tani maha mid ka wada siman nolol maalmeedka iyo hawlaheena shaqada; cilmiyeysan ee shaybaadhka .


III. Qiiyaasta kalfin

Qiiyaasta cusub ee heerkulku waa kalfiin waxaana soo dhiraan dhiriyyey (lordh kalfin). Waxa u cayimay 273 barta barafka iyo 373 barta baylinta. Oo looqaybinayo inta udhaxaysa labada barood ee go'an oo loo qaybinayo 100 iswada leeg, qiiyaasta kalfan ee ku sugaran heerkulka aadka u qabaw, barta fadhisinta barafka 0°C selshiyas qiiyaasta fikrada tijabada- -273°C (ok) dhamaan tamarta kul waana lawareejin walaxda ama saxarada intay istaa-gayaan. Heerkulkan hooseaya waxaa lagu magacaaba absult siro (Absolute zero).

Halbeega heerkulku waa kalfiin. Summadisuna waa 'k' lasiin maayo summada digriga.

Qiiyaasta heerkulka

Farhnayt Selshiyes kalfan



Jaantuska 6.41 Heerkulbeega akhrin kala duwan leh

Akhrinta heerkul beega

Marka heerkulka ku xeersan hawada muga meerkurigu wuu kala bixi, saamaynta meerkuriga dhuunta ku jirta waxaan lagu akhrinayn marka u dibada uga baxo qiiyaasta dhuunta ayaan ka garanaynaa heerkulka. Tani waxay sababi qiiyaasta meerkuriga kujira dhuunta. Heerkulka waxaa lagu akhrin qiiyaasta dhuunta.

Hawlalka 6.5: Cabbirida heerkulka jidhka

Qalabka aad u baahan tahay biyo heerkulkoodu kala duwan yahay. Heerkulbeeg

- Tijaabi inaad cabbertid heerkulka biyaha weelka kaladuwani ku jira iyo jidhkaaga adoo isticmaalaya heerkul beega .
- Ku qor halbeegyada qiyaasan miiska waraaqda
- Isbarbardhig heerkuladan kala duwan kee baa aad u qabow, u kulul, aad u kulul?

Hubin 6.3

- Maxay kalayhiin qiiyasaha heerkul baraha go'ani qiiyasohoodu waa kuwee?
- Qeex waa maxay barta hoose iyo barta sare ee sugaran?
- Waa maxay halbeega heerkulku?
- Imisaa loo qaybinayaa barta udhaxaysa ta hoose iyo tan sare qaybalba?

6.4. Iskubadalka Qiyaasaha Heerkulka

Si loo badalo akhrinta mid qiyaseedka heerkulka loogu badelo midkale. Waxaan isticmaalay naa xidhid-hka ka dhe xeeya samiga u dhexeeya barta karkarka iyo barta barafka = samiga faraqaudhaxee ya barta sare iyo barta aan lagaran.

i.e.

$$\frac{\text{udhaxaynta selsheska}}{\text{udhaxaynta feranheyt}} = \frac{T_C - \text{barta baraf ka } {}^\circ\text{C}}{T_F - \text{barta baraka } {}^\circ\text{F}}$$

$$\frac{100}{180} = \frac{T_C - 0}{T_F - 32}$$

- b. Ubadalida selsheska qiyaased ilaa feranhayt ama iskukala badal, waxaan isticmaalaynaa

$$T_F = \frac{9}{5} T_C + 32^\circ$$


$$T_C = \frac{5}{9}(T_F - 32^\circ)$$

- t. Ubadalida selsheska ilaa kalfiin ama isku kalabadal, waxaan isticmaalaynaa:

$$T_K = T_c + 273^\circ$$

$$T_c = T_K - 273^\circ$$

K	°C	°F
373	- 100	- 212
363	- 90	- 194
353	- 80	- 176
343	- 70	- 158
333	- 60	- 140
323	- 50	- 122
313	- 40	- 104
303	- 30	- 86
293	- 20	- 68
283	- 10	- 50
273	0	32
263	- 10	- 14
253	- 20	- 4
243	- 30	- 22
233	- 40	- 40
223	- 50	- 58
213	- 60	- 76
203	- 70	- 94
193	- 80	- 112
183	- 90	- 130
173	- 100	- 148



212 barta bay linta biyaha

58°C (136°F) heerkulbeega ugu sareeyaa aduunba Al – Azzia Libiya sebtember 1922

Celcliska heerkulka maalinta
37°C (98.6F)

Barta fadhisinta (dhalaalinta)
ee jooga bada

Maalin qabaw

112 -89°C – 129°F heerbullea housega ee ladiwaa galiye adunba foostar an tartib julaa 1983

Jaantuska 6.5 akhrinta heerkul beega kal duwanaa shaha qiyaasaha

Tusaale

1. Heerkulka qolku waa 20C. waa imisa heerku lka qolku marka uu yahay
b. Qiyaasta feranhay t. Qiyaasta kalfan

Slin	Waydiin	Fur - furis
$T_C = 20^\circ\text{C}$	b. $T_F = ?$	$\frac{9}{5}T_C + 32^\circ = \frac{9}{5} \times 20^\circ + 32^\circ$
	t. $T_k = ?$	$= 36^\circ + 32^\circ$
		$= 68^\circ\text{F}$
		t. $T_k = T_c + 273^\circ$
		$20^\circ + 273^\circ$
		$\equiv 293\text{k}$

2. Muxuu noqon heerkulka Akhriskiisn qiiyaasta selshiyas marka akhrisku yahay qiiyaasta farhanyt 0(zero)?

Slin	Waydin	Fur - furis
$T_F = 0$	$T_C = ?$	$T_C = \frac{5}{9}(T_F - 32^\circ)$ $= \frac{5}{9}(-32^\circ) = \frac{-160^\circ}{9}$ $= -17.8^\circ C$

Hubin 6.4

1. Qor xisaabahaan xidhidhka ka dhexeeya selshiyas iyo farhanyt qiiyas toodo
 2. 56°C ubadal $^{\circ}\text{F}$ iyo k
 3. 210°F ubadel $^{\circ}\text{C}$ iyo k

6.5. Ilaha Kulka


Hawqalka 6.6 kadooda

- i. Waamaxay kulku?
 - ii. Maxaan ugu baahanahay kulka?
 - iii. Qor Qaarkamid ah iiaha kulka laxidhii dha Noloshc ?
 - iv. Waa maxay faraqa udhexeeyaa kulka iyo heerkulka?

Waa maxay kulku?

Kulku waxa uu inoo sheegaya walaxda layidhaa Kaalori. Dadku waxay leeyihii, Jidhka kululi waxa uu leeyahay kaalori badan, marka loo eego tan qabow. Laakiin tijaabo isdabajoog ahayd baa tilmaantay

kulku inuu soosaaro badal tamareed iyo kulku inuu yahay waji kamid ah tamarta. Magaranaysaa dadkii hore in ay isticmaalijireen kulka wax kukarinta? Ka wada xaajooda saaxiibadaa iyo waalidkaa? Ilaha tamarta ee wadankeena alwaaxda (xaabada) dabka, qoraxda, dhuxusha, shidaalka, shawladaha korontada IWM. waa ilaha tamarta ahee laguna isticmaalo deegaamadiina



b. Qorax



t. daawaha korontada



c) dhuxusha

Jaantuska 6.5 Qaar kamidah ilaha tamarta

Meelaha ugu ilaha tamarta badani waa qoraxada.

Tamarta Qoraxdu waa tan ugu muhimsan nolasha. Dhirta, xayawaanka iyo bini aadamkuba waxay u baahan yihiin tamarta qoraxda si ay ugu noolaadaan dhulka.

Jan 6.6 waxa uu ina tusaya ilaha kulka. Siyaabaheebay dadku u isticmaalaan kulka?

Heerkulku waa cabbirka kulaylka iyo qabawga ee walaxdu ay leedahay halka kulku kayahay waji kamidah wajiyada tamarta kaasoo u kala gudba kulaylka Ilaa qabowga.

Halbeega caalamiga ee kulku waa Juul

Wadankeena, dadka badankisu waxay isticmaalaan xaabada dabka iyo ilaha gaaska loo isticmaalo tamarkul si wax loogu karsado iyo ujeedo kalaba marka laban xaabada dabka iyo gaaska aan shidano waa tamaraan la soc elinkarin si balaadhan baan u isticmaalnaa waxaan ubaan nahay tamar lasoo celiyo sida tamarta qoraxda, tan da baysha iyo tan biyaha.

Maadaama aad tahay wadani inaad isticmaashid haha tamarta si caadi ah uyo walib waxaa kaa saaran masuuliyad in aad usheegtid fikradan saaxiibadaa iyo qoys kiinaba.

Hubin 6.5

1. Qor ilaha tamarta ee maalin walba
2. Qeex jihada uu socodo kulku meel ilaa meesha kale.

6.6. Saamaynta kulka

Hawlgal 6.7

Kadooda adiga iyo saaxibadaa

- i) Jidhka maxa ku dhaca markaad is kulaylisid? balqor saamay naha kulkaas
- ii) Sadax u qaybi saamaynaha.

Markaan jidhka kulaylino, saamayno kala duwan ban dareemaynaa markad kulaylisd walaxda waxaa ku dhici gubasho, dhalaalid, fidid heerkulkoo kor ukaca, kaa oo casaada, galaaska oo kala Jaba Iwm.


Saamay natakulka waxo looqaybiyaad sadex qaybood.

- b. Korukaca heerkulka
- t. Fidida
- j. Xaaladisa ubadalo

b. Sababida kulka oo heerkulku kor ukaco

Hawlalka 6.8 kulay linta walaxda oo sababta korukaca heerkulka

- i. Qalabka loo baahan yahay:- gaalas, biyo, ilkul, heerkulbeeg iyo caro.
- ii. Ururinta qalab ka loo bahan yahay waxaa ku tusi Jaantuska 6.7
- iii. Qaado heerkulka biyaha intaan ladiirin kahor. Kafiiribaa
- iv. Hadda kulayli biyaha iyo cabbirada heerkulka daqiiqad kasta kadib.
- v. Diwaangali cabbirkha heerkulka wakhtigana u eeg.
 - Qeex waxaad diwaan galisay
 - Maxaad ku gabagabeyn lahayd




Jaantuska 6.7 Ku lay inta biyaha

t	Min	0	1	2	3	4	
T	(°C)						


Marka kulaylintu korodho tamar socodka saxaraduna way kordhaan. Tan waxaa sababa heerkulka kordhay ee walxaha. Gudahaan marka walaxdu gaadho kulka heerkulkeeduna waa u kordhi

t. Sababida kulka oo kala bixidu timaado

Maadamo lakulayliyey tamarsocodka saxaradu way kordhaan. Moolkuladuna aad bay usoconayaan qay bokamida h natijadani waxay siyaadin baxada oodhan kalabixida walaxduna way kordhay gaaska, dareeraha, iyo adkeyaashu way fidaan marka lakulayliyo ama way ururaan marka laqaboojiyo. Si aan udareeno saamaynta kulaylinata baxada adkaha,



b. laba qabow



t. laba kulul




j. laba kulul


Jaantuska 6.8 kelabixida

Hawlgalka 6.9 /tijaabada shay baadhba kubada iyo fargalka)**Qalabka loobaahan yahay: kubad birah, dun, fargal birah oo gacan qabsileh ilokul.****Dariiqada:**

1. Heerkul su'gan, kubada waxaan kabixi naynaa fargalka (eeg jan – 6.8) (b)
2. Kubada kaligeed kulay li kunatijaabi inaadka bixisid fargalka (Jan 6.8 (t))
3. Labadaba kulay li si isdabajoogah iyo kutiiab, inaad kadhex bixisid. (jan – 6.8(J))
 - i. Maxaad ka fahantay hawlgalkan Ku tijaab inaad?
 - ii. Maxay kubad u uga bixiwayday marki laku laliye ka hor?
 - iii. Maxay kuubadu uga baxday marki laku laliyey? Kadib?



Jaantuska 6.9 dhunta biyaha marka la diiriyo kala baxaysa



Jaantuska 6.10 Hawada kalabaxaysa

Jan 6.9 iyo jan 6.10 waxay mujinayaan dareeraha iyo dhalada sijoogto ah.

j. Waxyaabaha sababa waji gadoonka**Hawlgal 6.10**

- i. Waa maxay sadexda waji ee maaterku?
- ii. Waxajirasadex xaladod oo biyuuh leeyahay waa ku wee?

Sadexda xaladood ee walxaha su'gani waxay kala hihiin a- adke , b- dareere , iyo Neef. C- Neef saxaradiisu way isku urursan yihiin iyago sugan. Marbay kala baxaan fogaan su'gan bay iskuJiraan. Saxarada dareeruhuna iskuma dhaw sida adkaha oo kale meelna kuma sugna. Neef (umiga) celcelis koodu waa kala baxsan yihiin saxaradoodu iskuma dhawa Biyo hawo dareeraha caadi ahaan laga helo dhulka.

Kani waa adke, dareere iyo Neef (gaas).

- Adke Biyo (bara F) waxa u kahoose yaa 0°C.
- Dareere Biyo (Biyo) kusugan yahay 0°C – 100°C
- Gaas Biyo (umi) kusuyan yahay 100°C iyo wixikasareeya.

Isbadalka adke biyo (baraf) ilaa biyo ama isbadal ka umiga ayaa layidhaah adaa, isbadalka walaxda.

dhalaalka adkaha → dareere

bay linta dareerah → gaas (umiga)

Su'aalo Furan

1. **Mafahantay saamaynta qabawga marka gacantaadu ay nadiif tahay ee alkoosha la taabsiyo marka irbada lagugu turqayo?**
2. **mataqaana jidh kaagu sidau isaga saaro kulka aan loo bahnayn?**

Dhalaalin

Marka adkaha kulayl lagu dhalaaliyo xaalada adke waxay noqon darere. Xaalad isku badalka ah adke hawo iyo dareerah waxa layidhaa **dhalaalin**.

Heerkulka caadiga ee adkaha ku badalmo waxa layidhaa barta dhaalinta ee adkaha adkeyaasha kala duwaani waxay leeyihii bar dhalaal kala duwan. Tusaale. Adke biyo (baraf) dhalaalinta dareeraha 0°C iyo adka birah way dhalaalaan waxay noqdaan dareere birah 1536°C.

Baylin(kuleylin)

Marka biyaha la kululeyo, ee biyuhu isroogaan marka hore waxa uka Abuurmi salka ama cidhifka koontenarka. Biyuhu si isdabajoogah bay udiirayaan heerkulku korbuu, u kici moolikuyuuladana qayb baa bixi . Habkan isubadalka dareeraha iyo xaladisa waxaa layidhaa baylin . Heerkulka cadee dareeuhn isu badalo waxaa layidhaa barta baylinta . Ee dareeraha. Tusaale biyuhu waxay ku beylaan 100°C ama meerkurigu u kubaylaa 357°C.


Umibax

Umibaxu waa isbadalka dareerahu iskubadelo umi ogada walaxda heerkul kastaa. Marka la kulileyo molokuyuuduna udhawyihii ogada dareeraha waxay galaan hawada, lakiin molo kuyuuloda maha waxay leeyihii tamaro ku filan oo ku bahsan. Tusaale biyo barkad kujira. Har ama badwayn, dhar qoyan, dhalo daboolan, umibaxda waxay ku kululaatay qoraxda

Umibaxu waa kalabixida dhaqsaha badan eewalxda b) isha kulka t) dabysha c) marka walaxdu ogadeeda bedlabalaadhiyo tusaale:- biyo barkad kujira ayaa u'umibaxay si dhaqso ah qoraxda. Maalinta dabayshan iyo marka ay dabayshu socoto ogada bedka lid baykunoqon, umibaxu waxa u yar yahay marka roobka (maalita) uaha haqwadu mar ka oogeduyaraato .

Marka dareeraha molokuyuuladiisu umibaxaan, way ku qaboobaya oogada ay ku baxsadayn sabab waxay lumiye kul marka umibaxu waxausababaa qabiowga.

Shaxda 6.2 Farqau dhexga baylinta iyo umibax	
Baylin	umibax
• Waxa u kadhca barta baylinta	• Waxa u kadhacaa heerkul walba
• Ukadhaca dareeraha Jidhka ka baxsan	• Kadhacaa ogada jidhka adkah ama dareerah
• Saamayn qabow malaha	• Saamay qabow kumalahe jidhka
• Kumasalysna dabay sha iyo ogada Jidhka	• Wukudheergaa kulka iyo dabaysha maalinta iyo ogada jidhka



Jaantuska 6.11 walxo kala duwan oo uumi baxaga.

Hawlgalka 6.11

Si aad ufahntid saamaynta qabowga iyo umibaxa

- Fartaad gli alkoosha iyo horey ugu saar farta kawda. Maxaad dareen tay?
- Qeex maxaa kudhacay alkooshi ama Fartii

Saamaynta qabowga umibaxa waxa uleeyahay faido. Tusaale Ta laajada iyo xaalada hawda habkan waxaalo isticmaali umibaxa qiyaasaha wayn. Umibaxu waa muhim wareega biyaha siuu'u saameeyo robka ogada dhulka.

Hawlgal 6.12

Siloocabiro bart dhalaal barafka iyo barta bay linta bigahe

Cabbir heerkulka adkah barafka, dhalaalinta barafka kulka natija da biyaha ilaa in ta. Umiga iyo barta baylinta biyaha qor. Maxaad dareemi, barta baylinta ee biyaha? Maku layleen 100°C deegan biina

Hubin 6.6

- Qeex sadexda saamayn ta kule kulaylinta
- Cadee farqiga udhe xeeya umibaxa iyo baylinta
- Maxaa saameya korukac umibaxa?

Soo koobbid cutubka

Cutubkan waxaad kusoobaraty

- Heerkulku waa cabbirka darajada qabowga iyo kulayka ama celcelis ka mulkulka tamar socodka walaxda qalabka cabbiraada lagu isticmaalo waxa layidhaa heerkul beeg
- Ken heerkul beega ko'khrinayo heerkulka walaxda ee kuwan sosocda. Waxayna kalayhiin qiyaasaha celshiyas ($^{\circ}\text{C}$), Farahnagt ($^{\circ}\text{F}$) iyo qiyaasta kalfan(k)
 $T_{\text{C}} = \frac{5}{9} (T_{\text{F}} - 32^{\circ})$
 $T_{\text{F}} = \frac{9}{5} (T_{\text{C}} + 32^{\circ})$
 $T_{\text{K}} = T_{\text{C}} + 273^{\circ}$
- Kulku waa waji kamid ah tamarta waxaa kahelnaa kulka qorxda, cuntada aan cuno, koronta da, gaaska iyo xaabada (dabka).
- Saamaynta kulaylinta walxaha waxa kamidah fidida heerkulka ama isbadalka xaaladah. Fidida gaaska caadiqa badan dareeraha iyo adkaha dareeruhu wuka hor fidaa adbaha
- Isbadalka adkaha iyo areeraha waxa layidhaah dhalaalin. Isbadalka dareeraha iyo umibax waxa layidhaa hsoo baylin. Samiga umibaxu waxa u ku xidhan yahay kulka qaadaya, ogada bedka walaxda (dareere) iyo dabaysha ku wareegan ogada.

Nakhtinka su'aalaha iyo masaloyinka

I. ku qor run hadijj umaldu tahay sax ama been hadii jum ladu tahay Khalad

1. Marka ha'wadu qabawtahay, way fidaa _____.
2. Kulka iyo heerkulku waa iskumid _____.
3. Tamarta korontada waxa loo isticmaali, karaa ilaha kulka _____.
4. Islika waxaa lo isticmallikaraa tamar kulka _____.
5. Xawaaraha kulaylintu waxa u dhaqaajiyanaa moolikuuyalada _____.

II. kadoro eraya ku hoos qorn 'A' erag Iamidka ee u dhigma 'B' hoisted ka dooro

Qaybta 'A'

1. Fidid
2. Heerkul
3. Qiqaasta senliqreyd
4. Kogid
5. Heerkulbeeg
6. Shidaal
7. Qorax
8. Bay lin(kuleylin)
9. Umibax

Qaybta 'B'

- b) cabbirka kulaylka iyo qabowga
- t) 100 loo qaybiyey inta udha xaysa
qabowga iyo barta baylinta biyaha
- j) Baxada ooyaraata
- x) Baxada oo koradha
- kh) walaxda aburta kulka
- d) isha shu caaca tamarta
- r) waa habka waxkarin ta
- s) meel dhiq darer lahaan

III. Jawaab gaaban kabixi

1. Qalabka lagu cabbiro heer kulku waamaxay?
2. Wamaxay bar baylinta iyo dhalaalinta biyuhu?
3. Maxaa kudhaca walaxda marka lakulayliyo?
4. Magacaw sadexda qiyaasodee kaladuwani ee heerkulka?
5. Wamaxay fanraqa udhaxeya baylint a iyo dhalaalinta?
6. Waa maxag saamaynta kul fidku?
7. Maa maxay farqa u dhexeya baylinta iyo umibaxa?
8. Waa maxay sadexda amuurood ee saamaynaya umibaxa?

IV. Eraygaku haboon ku buximeelaha banaan

1. Qalabku inta badan _____ marka heerkulkiisu kordho waa ururaa marka heerkulku hooseyana (qabobo).
2. _____ Waa cabbirka celceliska tamar socodka saxarada walxaha.
3. Halbeega heerkulku waa _____
4. Halbeega kulku waa _____
5. Xaddiga kulaylka iyo qabowga wa xaa lagu cabbiraa _____
6. _____ Waa isku badalka dareeraha ilaa, umibaxa.

V. Masalooyin

1. Waa imisa akhriska heerkulka ee kalfiin qiyaasedka haddii qiyaasto aasta selshiyasku yahay 50°C.
2. Heerkulka walaxda 40°C. Imisa ayuu noqon qiyaasta farhanytkiisu?
3. Maxuu noqon heerkulka qiyaas akhriska farhanyt marka qiyaastu tahay 310K?

Ujeedada cutubkan: Marka uu cutub kani dhamaado waxaad awoodi doontiin:-

- ✓ Fahanka fikradaha jabaqda.
- ✓ Iney kobocdo awoodaha kartiyeed ee ay kuxalinayaan masalooyinka fikad ahaaneed ee jabaqda.
- ✓ Fahmaan xidhiidhka ka dhexeeya walxaha.
- ✓ Waa iney siguud u kabado aqoontooda laxidhiidha maadada fiisigka.

Hordhac

Waxyaabaha cajaa'ibka ah ee aynu badanaa deegaankeena kala kulanaa waa jabaqda. Waxaa laqayaabaa baa maalinti inaan maqashid jabaqyo kala duwan sida:-

Mobaylka, baabuurka, qaylada, kaftan ka saaxiibada, hadalka macalinka, heesaha, dhamaan kuwaas aan soo sheegnaay waxaad ku dareentaa dhagaha. Hadaba cutubka waxaan kubaraneynaa Jabaqdu wuxuu aytahay, soo saarida jabaqda iyo gudubka jabaqda.

Xawaaraha jabaqda ee dhexyaalee kala duwan noqodka jabaqda (dayaanka). Iyo qaarkamida isticmaalka (dayaanka).

7.1. Qeexitaanka Jabaqda

Hawlalka 7.1

- i. Sheeg ilaha Jabaqda.
- ii. Xubnaha dareenka kee baa laqu qartaa Jabaqda
- iii. Sharax macnaha jabaqda.
- iv. Maxaynu, u isticmaalaa jabaqda.

Waligaa magaraacdyaan? Marka garaacdidi xadhigiisu waxuu bilaabayaa inuu gariiro, kadibna waxaad maqleysaa Jabaqdo muusiga. Marka bir, lequ dhufto dhagax ama birkale birtu way gariirtaa, gariir kan wuxuu usocdaa hirarka jabaqd (Fiirjaantske 7.1)



Jaantuske 7.1 Jabaqda waxaa lagu maq laa dhegta

Jabaqdu waxay leedahay hirarkala duwan , jabaqdu waxay leedahay tamar, haddii aad dhegtaada dhigti dmeel u dhaw hirarka jabaqda Tamarta jabaqdu waysii yaraataa marba marka kadanbeysa. Waxaynu ogsoonahaa in jabaqdu ay dhagaheenu maqlaan ay soo dhexmarto hawada

Jabaqdu waa nooc kamida tamarta waxaaana sameeya gariirka taxanaha ah ee walaxda.
Mkasta oo kamida ilaha jabaqdu waxay leedahay gariir.

Waxaa jira noocyoo kale oo jabaqda kamida oo ay dhagtu dadku maqli kareynin laakiin, xayawaanada kale maqlikaraan

Xaqiijin 7.1

1. Waa maxay jabaqdu?
2. Side bay jabaqdu kusoo gaadhaa dhegta?

7.2. Soo Saarida Iyo Gudubka Jabaqda

Hawlgalka 7.2

- i. Soo qaado qalabyo kala dunan ee deegaan ka laga helo sida: siidhi, mastarad, I.W.M oo soo saar jabaq adigoo isticmaalaya
- ii. Sharax sida qalab kastaa ku soo saar jabaqda.
- iii. Sidee bay jabaqdu kusoo gaadhaa dhaga heena?

Hadii aynu fiirsano sida ay mastaradu usoo saarto jabaqda. Soo qaado mastatad kadibna taabo dhamaad, ay mastaradu dultaalo miiska, adiga, oo garaacaya oo kucelcelinaya garaaca giftinka miiska sida jaan tuska 7.2, kamuuqata.

Marka mastarada, aad loo garaaco waxay gariir usameysaa kor iyo hoos. Hadaba marka ay mastaradu ugariircyo kor iyo hoos, waxay soo saarey saa **Jabaq**.

Sidaas darteed jabaqda waxaa soosaara gariirka walxaha.



Jaantuska 7.2 soo saarida jabaqda

Hawlgalka 7.3


- i. Kalagoo cinjirka kadibna kuqabo ilkaha haldhidnac dhinaca kalena kijiid gacanta si uudherer, usamee.
- ii. Marka la baad riix dhexda cinjirka adigoo u riixaya dhina, kadibna si deg deg ah usiidaa, kucelcetina dhawr jeer, markaa waxaad dareemeyso gariir? Miyuu samayna yaa Jabaq .

Hawl galkani wuxuu kugu hagaaminaya inaad dhistiin noocyada kala duwan ee xadhkaha qalabka muusikada sida giitarka ama maansiqaads, kuwan oo ah qalabka aan soo sheegnay haddaba ma u malaynaysaa in gariirkoo soo saaro jabaq?

Hawlgalka 7.4

Kuqor shaxdan soosocota buugtiina ooiskudaya inaad diwaan galisid gariirada kaladuwan ee ay sameynaya qalebka muusikada ee lagu gu siyey shaxda soosocata.

Islaha jabaqda	Qeypta gariirka
1. Durbaan	1. _____
2. Giitaar	2. _____
3. Turunbo	3. _____
4. Miyuusiga	4. _____
5. Biyaano	5. _____



Jaantuska 7.3 walax gariireysa

Hawlgalka 7.5

- i. Kubad yar oo wareegsan ay kor loogu xidhey saqaf, iyada oolagu soo dhaweynayo. Bir faraaqyo gariiraysa leh sida kamuuqata jaantuska 7.3, Hadaba maxaadku ar keysaa?
- ii. Kudhufo birta dube yar, kadibna taabo kubada maxaad ka la kulmay saa?
- iii. Maxay tani kutusay saa?

Marka aad taabsisid kubda birta faraaq yada leh waxba madareemaysid. Laakiin marka aad bir faraaqyada leh kudhufatid dubaha waxaad dareemeyso gariir ka. Muuqanaya birta qabkeeda hadaba hadin aadmarkan ku bada u dhawaysid birta, kubadu way ka durkeysaa. tanina waxay ina tusey saa iney tamartu ugudbayso kubada, kubadu waxay yeelaney saa gariir.

Dhamaan jabaqaha aan maqalo waxa sameeya wa xo gariira. Kadibna hawada kudhaw walaxda gariireysa ayaa ukale qaada dhinacyada kaladuwan. Jabaqda sameys may saana waxay ukala socota dhinackasta. Oo ah noockamida tamarta, waxayna soo gaadhaa dhagteena. Jabaqda jalaska dug sigiina waxaa laga maq laa dhamaan meebleha kuwareegsan dugsiga; sidaas darted jabaqdu waxay usoco taa dhinac kasta.

Su,aalo furan

1. **Waa maxay saddex shey ee looga baahan yahay jabaqda.**
2. **Sheeg qaarkamida ilaha jabaqda.**
3. **Waa maxay gariirku?**

Gudbida jabaqda

Hawlalka 7.6

Si, aad u arag tiin gudbida jabaqda ee adkaha laba arday ha fadhiistaan laba cidhifk ee miiska hana sameeya haw lgalkan.

Talbaabada koowaad: Hal arday ha ku dhufto fartiisa ama qalin dhinacakele ee miiska iyada oo labada ardy ee kale ay fadhiyaan dhinaca kale ee miiska, oo aydhagey san ayaa, miyaad maqley saa kudhuwa shada mise mmeqleysiin.

Talaabada labaad: Hada ardayga kale ee fadhiya dhinaca kele ee ay dhagtiisu udhaw dahay miska waydii. Wuxuu maqley. Ma sheegi kartaa farqiga udhexeeyaa tallaabada koobaadiyo talaabada labad. Maxaad ku gabogabaynay saa hawlalkan




Jaantnske 7.4. Jabaq oo dhexmareysa Adkeyaal

Jabaqdu waxay ubaahan tahay qalab dhex yaal ah oo ay dhemarto.

Marka aynu fasalka kujirno waxaan maqashaa garaac jalaska, qay lada ardayda soo dhicitaanka moobaylka, iyo qay lada ambalaasta. I.W.M. Hadaba jabaqdu sidee bay u socota oo ay inoo soo gaadhaa dhaga heena? Qalabka ay dhemarto ee soo gaa dhaysa dhega heeda jabaq de ayaa looyaqaanaa dhex yaal.

Jaantusyade 7.4 iyo 7.5 waxaa inooga muuqda Adke iyo dareere gudbinaya jabaqda.



Jaantske 7.5

Sida aad u aragtid socod jabaqda ee dareeraha soo qaad saacada dhawaaq da, waxaad dhexdhig taa baalди salkiisa kadibna waxaad taabataa qdobka yare ee lagaga dhawaaq sinaya adiga oo dhageysanaya dhawaaqa saacada? Miyaad maqley saa dhawaaqa saacada.


Dhamaan walxuhu waygudbiyaa jabaqda laakiin heerka gudbintoodu is kumid ma'aha walxaha adkayaashe ah ayaa gudbinta kaga fican dareeraha iyo hawadaba jabaqdu waxay u baahan tahay dhex-yaal ay soo dhexmarto, mana dhax socon karto dululaatiga madhanaha ah.

Tan waxaa lagu hubin karaa isticmaali jalas danabeedka haddii dibada loo saaro jalasku isaga oo dhacaya markaas hawadu waykabaxay saa kadibna codkiisu aayar, aayar ayuu usoo baxayaa ilaa in ta laga maqlayo

Tani waxay dhac daa marka ayna jirin hawo qaada jabaqda

Xaqijin 7.2

1. **Qeex sida jabaqdu ku sameysanto?**
2. **Sharax qalab ugu muhiimsan baahinta jabaqda.**



Tuunbo madhan

Jaantske 7.6 Jabaqdu kuma qudbayso dulu laatiga madhanaha ah.

7.3. Xawaaraha Jabaqda Ee Dhexyaalada Kala Duwan

Xawaaraha Jabaqda ee hawada

Marka uu han qadhku dhaco waxaad arkeysaa marka horey hilaac in ta aadan maqal han qadhka.

Tani waxay ina tusaysaa in xawaaraha jabaqda ee hawadu uu aad uyar yahay xawaaraha ileyska.

Marka uu tareen kuusoo jiro 1km waxaad arkeysaa qiiqaka baxaya egsaaska inta aadan hoonkiisa, maqal Tana macnaheedu wuxuu yahay jabaqdu u dhex socon kar to hawada sida ilays ku, uu dhexmaro ee deg dega ah.

Hawigalka 7.7

- Markeebaynu jabaqda umaqalaa si sax ah mahabeenkii, mise dharaartii.
- Maxaa ku dhaca codka raadiyawga ama Tvga marka aad dhagaysaneysid. Warka ama heesaha. Wakhti yada habeenka iyo maalintii? Miyaad badeshaa codka marka loo eego wakhiga? Mise mabadeshid?

Xawaarahe jabaqdu eehawadu waa 331 m/s. marka heerkulkuyahay 0°C. xawaaraha jabaqdu wuxuu kor dhaa 0.6m/s marka heerkulku dhigrii selishiyos ku kordheba.

Xawaaraha jabaq ee hawada heerkulkasta(V_T) ha ahaadee waxaa lagu xisaa biyaa

$$V_T = v_0 + \frac{0.6}{10^6} \times T \text{ marka } v_0 \text{ tahay xawaaraha jabaqda ee heerkulka } 0\text{C}^\circ \text{ "T" aytahay faraqa heerkuka.}$$

Xawaaraha jabaqda ee dareeraha iyo adkaha ma, saa meeyo ama saamayn kuma laha is bedelka heer kulku, laakiin wuxuu saameeyaa qaab kooda, faraqa xawaarayaasha jabaqda ee qalabyad kale duwan waxaa si fudud looga fahmayaa qaabka moolikiyuu lada walaxda.

Markaad dib u eegid cashiradi kimistariga molokuyuula du waxay yihii iyo qaababkooda iney ku kala duwan yihii wajiyada kala duwan

Gudubka jabaqda ee walxaha kala duwan wuxuu ku xidhan yahay qaabab qurub yada walxa maadaama ay qurubyada adku ay aad isugn dhaw yihii way fududahayinuu dhexmarto jabaqdu markay gurubyo isjiidhaan jabaqdu waxay usoconeyesa sixawli ah.

Laa kiin dareeraha iyo hawada, qurubyadoodu maadaama oo ay aad ukala fogiyihii, isjiidh ka gurubyada wuxuu dhacaa marar. Jabaqdu waxay uga gudubtaa sikayar sida ay adkaha ugu gudubto sidoo kale qurubyada hawada jabaqdu waxay udhexmar taa sika fudud sida ay udhexmarto dareeraha.

Sidaas darted. Jabaqda dhix maraysa dareeruhu way kayar tahay tadhix mardyse adka, jabaqda dhix mareysa hawaduna way ka yar tahay tadhixmareysa dareeraha xawaaraha jabaqda ee biyuhu wuu kaweyn yahay xawaaraha jabaqda ee hawada miyuu xawaaraha biruhu eejabaqdu ka wayn yahay xawaaraha jabaqda ee biyaha.

Xawaaraha jabaqda ee qalabyada kaladuwani waxaad ku arki doontaa suaxda soo socdai ee 7.2

Shaxda 7.2 xawaaraha jabaqda ee walxo kaladuwani ilaac 0°C iyo 20°C

Walxahe	Xawaaraha (m/s)0°C
Hawada ogsijii Hawo	316 331
Dareeraha Ethanol mekuri	1150 1438
Adkaha Naxaas maar muraayada Bir	1948 4998 5628 5948

Hawlgalka 7.8

- i. Sheeg qalabka jabaqda ugudbiya sixawli ah
- ii. Sheeg qalabka jabaqda ugutbiya si aayar, ah
- iii. Isbar bardhig xawaaraha jabaqda ee dareeraha iyo ka adkahaba

Tusaale 7.1

1. Hanqadh ayaa lamaqley 4seken kadib markii uu hilaacay. Haddii fogaan ta hilaacu tahay 1396m, ay ka fogtahay qof ka arkey. Waa imisa xawaaraha jabaqdu ee heerkulkan?

Siin	Waydiin	Fur-furis
$t = 4s$	$v = ?$	$s = vt$
$s = 1396m$		$v = \frac{s}{t}$ $v = \frac{1396 \text{ m}}{4s}$ $= 349 \text{ m/s}$

Xaqijjin 7.3


1. Qeex sida aysuurtaglka utahay inaad raadisid xawaaraha jabaqda ee hawada?
2. Sheeg xadya saameynta ku leh xawaaraha jabaqda ee hawada?

7.4. Noqodka Jabaqda (Dayaan) (Echo)**Hawlgalka 7.9**

Saxinbadaa kala dood sulaalahan soosocda.

- i. Maxaa maqleysaa haddii Aad aqal madhan dhax istaagtid oo Aad qeylidid?
- ii. Maxaa looyaqaanaa jabaqda Aad sameysay?

Marka aad kubad ku tuurtid gidaarka, kubadu waxay samey saa jabaq wayna soo noqotaa, markaa waxay odhanaynaa noqodka kubada. Sidookale marka aad ku qeylidid aqalmadhan jabaqdu way kugu soo noqon, iyadoo kasoonoqoneysa gidaarka, xagaagana u soo noqonaysaa tana waxaan u naqaanaa noqodkajabaqda. Noqodka jabaqda ee ayjabaqdu ka noqoneyso oogo adag ayaa looyaqaa “dayaan” (echo)



Markasta oo ay jabaqdu gaadho xad, ama wax ka horyimaadasocod keeda, qeyb kamida tamar ta jabaqdu way luntaa, qeybna way noqotaa. Noqodka jabaqd ee ay jabadu kanoqotey xadka ayaa looyaqaanaa “dayaan”.

Walxaha adadag sida gidaarka, dhagax Buuraha, looxanta, iyo dhismaha I.W.M. waa celiya yaasha fiican eejabaqda. Maadaama oo ay adagyihiin; laakiin marka jabaqdu haleesho oogo jilicsan Sida? - dhogorta; dharka, I.W.M inta badan tamarta jabaqdu way luntaa. Marka aad qaylidid ama aad afuuftid siidhi adigoo fogaan yar ujira dhismodheer ama buur. Waxaa laga yaabaa inaad maqashid jabaqdii hore, jabaqdaa noqotayna waxaa loo kale sooci laba qaybood.

Tani waxay run noqoneysaa marka dayaanku ama noqodka jabaqdu ay ku gu soo gaadhaan 0.1 sekaa kadib. Kadib jabaq diihore tan macnaheedu waxau ya hay inay dhagtaadu ka la socodo laba jaba qood oo kala nooc ah mid innagu soo gaadhaysa 0.1 sekan kadib.

Xaqiijin 7.4

1. **Waamaxay dayaanku? Sharax sida uudhaco?**
2. **Ugu yaraan sadex tusaale kabix midkastoo kuwan sosocdo kamid ah**
 - b. **Jabaq celiyayaal**
 - t. **Jabaq nugayaal**

7.5. Adeegsiga Jabaqda Dayaanka

Hawlgalka 7.10

Cabbirida xawaaraha jabaqda adigo isticmaalayo habka dayaanka

- i. Ubaxameelbanaan oo aadka hel kar taan Geedo waawayn ama buurta
- ii. Istaag geed ama buurta horteeda sacabee ama aadudhawaaq.
- iii. Dayaan kii sacabka mamaqashay dib udhaqaaq ilaa in ta aad kamaq laysid dayaanka.
- iv. Waydii saxiibadaa cabbirka aminta qabaqda sacabka ee kasonoqo naysa Geedaha (buurta) intaukusoogaadhayo dagaan ku iyago jojinaya saca da ay isticmaalayeen
- v. Hada waxaad cabbirtaa fogaan ta udhaxaysa meesha iyo meesha aad taagan tahay iyo geedka wayn ama buurta salkeeda.
- vi. Ku dabaqa qaacidada xawaara ha $V = \frac{S}{t}$ ooxisaabiya xawaaraha jabaqda ee heerkulka maalin taa.

Hawlgalka kor kuxusan waxaad ku xisaabin kartaa fogaanta ugu gaaban ee nogodka oogada iyo xawaaraha jabaqda.

Sidaad darted 25 = VT maadaama fogaanta ay ku soconeysa jabaqdu aytahay wadarta fogaante jabaqda sii socotay iyo tan ay ku soo noqotay.

$$\Rightarrow S = \frac{vt}{2} = \frac{331m/sec}{2} \times 0.1 sec = 17m$$

Sidaas darted fogaanta ugu hooseysa ee dayaanku sameyso waa 17m. Majiro dayaan laga maqli karo fogaan kayar 17m. Hadii xawaaraha jabaqda ee heerkulkani haddii uu yahay 340 m/s. marka jabaqu noqodkeedu ka haleesho oogada noqodka. Meel janjeedha waxay udhawdahay jabaqdu iney wadanoqoto. Tana waxaa istimaala dhakhtarada waxayna u isticmaalaan garaaca wadnaha ama dhaq dhaqaqa sanbabada. Kuwaas soosheegneyna waxay kamid yihiin isticmaalada dayaanka ee qeybaha caafimaadka.

Tnsaale 7.2

Waa imisa xawaaraha jabaqda ee heerkulka lagu sinyey haddi aad dayaanka maqashay 4 seken kadib oo aad ka maqashay buurkuu jir ta 664m.

Siin	Waydin	Fur-furis
$s = 664 \text{ m}$	$v = ?$	$V = \frac{2s}{t}$
$t = 4\text{s}$		$= \frac{2 \times 664\text{m}}{4\text{s}} = 332\text{m/s}$

Tusaale korkuxusan wuxuu ina tusayaa Habka ugu muhimsan ee raadinta xawaaraha Jabaqda ee hawada. Haddaba ogaasheha xawaaraha jabaqda ee hawada ee heerkulada qaarkood iyo qorida farqiga aminta u dhaxaysa maqalka jabaq dii hore iyo dayaanka

Waxay inoo sahlay saa xisaabinta fogaanta noqodka oogada. Dayaanka waxaa kaloo loo isicmaalaa. Cabbir ka dhererka bada.

Xaqijin 7.5

1. Sheeg waxyaabaha loo isticmaalo dayaanka.
2. Sharax side dayaanke dhagax weyn loogu isticmaalilahaa in laga cabbiro xawaaraha jabaqda hawda.

Soo koobbida cutubka

Cutubkan waxaan kusoobaraney

- Jabaqdu waa hir ay maqasho dhagtu.
- Jabaqda waxaa soo saara gariirka walxaha waxaana gudbiya, adkayaasha, dareeraha iyo hawada. Jabaqdu waa nooc tamarta kamida
- Xawaaraha Jabaqda ee adkuhu wuxuu ka weynyahay xawaaraha Jabaqda ee dereeraha sidookale xawaaraha jabaqda ee dareeruhu wuxuu kaweyn yahay. Xawaaraha jabaqda ee hawada
- Marke ay jabaq du kagudbayso walxo kala duwan, waxay noqotaa iney wada noqoto, in badh noqdo, in qeyb lanuugo. Jabaqdu waxay usocotaa dhinac kasta
- Noqodka jabaqdu ay kanoqoneyso oogo adag ayaa loo yaqaanaa dayaan.

Dayaan ka waxaa loo isticmaalaa in lagu cabbiro foganta dhagaxyada waaweyn cabirka bada, iyo dhis mayaasha waaweyn ee sameeya ilaha jabaqda.

Nakh tiinka suaalaha, iyo masaloo yinka

I. Kuqor run, ama been. Su aalahsan soosocda

1. Dhamaan jabaqda waxaa soo saara garii'rka walxaha.
2. Jabaqdu waxay ka gudibtaa dululaatiga madhana ha ah.
3. Hawada ayaa ka gudbin, oogada jabaqda dareeraha
4. Marka heerkulka. Hawadu kor dho xawaaraha jabaqda hawadu wuu dhin maa.
5. Xawaaraha jabaqda ee hawdu afar jeer ayuu ka weyn yahay xawaaraha jabaqda ee birta.
6. Xawaaraha jabaqda ee hawada wuu ka weynyahay. Xawaaraha jabaq da ee adkaha.

II. Kubuuxi meelaha banaan ereyga ku haboon.

1. Saddexda shardi ee jabaqdu waa _____, _____, _____.
2. Dayaanku masamaysmo in ay oogada noqodku ayujirto _____ mitir isha jabaqda mooyee.
3. Xawaaraha jabaqda ee hawada marka heerku lyahay 0 °C _____ m/s.

III. Kajawaa su, aalahsan

1. Sharax sida jabaqdu kusameysanto
2. Waa maxay jabaqdu?
3. Sharax sababta xawaaray aasha adkaha iyo dareeruhu uga way naadeen, xawaaraha Jabaq da ee hawada.
4. Sharax sida uu dayaan ku usameysmo
5. Sheeg labo kamida waxyaabaho loo isticmaalo dayaanka.

IV. Ku aadi kooxda A, kooxda B.

Kooxda A

1. Jabaqda
2. Dayaanka
3. 4998 m/s
4. 5628 m/s
5. Turunbo
6. 331 m/s

Kooxda B

- b) Xawaarah jabaqda ee muraayada heer kulkeedu yahay 0°C
- t) Xawaaraha jabaqda hawada ee heerkul keeduyahay 0°C
- j) xawaaraha jabaqda ee maar, heerkul keedu yahay 0°C
- x) noqodka jabaqda
- kh) taxanaha gariirka ah ee ay dhagta baniaadamku dareento
- d) Waa qalab leh hawo gariireysa oo muusik ah

V. Masalooyinka

1. Fogaan intee dhan aynu dhagax wayn ku noqonayaa isha jabaq dayaankeen lagu maqley 5.3 seken (haddii xawaaraha jabaqdu yahay = 33 m/s)
2. Markab ayaa diray jabaq, kadibna waxaa soo noqday dayaan ka yimid bada hoosteeda mudo dhan 0.6 seken. Hadaba waa in qotada ay biyuhu ka hooseeyaan. Markabka (haddii xawaaraha jabaqda ee biyuhu yahay = 1450 m/s)
3. Fogaan inteedhan ayaa ujirtaa tareen aad aragtey qiiqiisa, 4.5 seken ka hor in taanad maqal jabaqdiisa (uqaado xawaaraha jabaqda V = 33 m/s)

Ujeedooyinka Cutubka: Cutubkani makra uu dhammaado dabadeed waxaad
Awoodi Doontaa in;

- ✓ Aad fahamtid fikradaha la xidhiidha danabka iyo Birlab- danabowga.
- ✓ Aad Horumarisid Aqoon taada xisaabinta Masaloooyinka eela xidhiidha danabka iyo Birlab- danabowga.
- ✓ Aad ku qanacdid xidhiidhka ka dhaxeeya Alaabada (sheyada).
- ✓ Aad Adeegsatid waxyaalo Badan oo Suur to- galinaya Horumarinta Aqoonta ku saabsan Fikradaha Guud ee Fisikiska.

Hordhac

